

Soomaaliya:

Baadigoobka Hannaanka Doorasho ee ugu habboon 2020-ka



July 2019

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2019, Muqdisho, Soomaaliya

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhedaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Xuquuqda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash loomaisticmaali karo <https://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/> Kala soo bax qoraalka bogga www.heritageinstitute.org



Kala soo bax qoraalka bogga www.heritageinstitute.org

Tusmo

Soo koobid:	1
Qaabka cilmi-baarista loo sameeyey	4
Fahmizza hannaan doorasheedyada	4
Khibradda Soomaalida: Doorashada iyo Xulidda Siyaasiyiinta	8
Jamhuuriyadda Saddexaad	13
Doorashooyinkii soo maray Somaliland	17
Qaababka doorasho ee ay Soomaaliya 2020-ka qaadan karto	18
Soo Jeedinta Baydhabo (closed list, proportional representation)	20
Soo Jeedinta Kismaayo (Soo jeedintii maamul-goboleedyada)	22
Hannaan doorasho oo hagaajinaya Qaab-doorasheedkii 2016 (Modified Enhanced Legitimacy)	24
Soojeedinta ah in beeluhu ay noqdan deegaan-doorasho (The Clan Constituency Option)	25
Is-waafajinta wax-qaybsiga beelaha iyo hannaanka xisbiyada	27
Gunaanad	27
Talooyin	28

Soo koobid:

Markii shanaad ilaa sannadkii 2000, Soomaaliya waxa ay baadi-goobaysaa qaab doorasho oo dalka u horseeda hannaanka dimuqraadiyadda. Taasina waa arrin marna la bogaadiyo, marna astaan u ah dib-u-dhac, waji-gabax leh. Hadalhaynta hannaan doorasho oo dimuqraaddi ah waxa ay muujinaysaa in dalku uu hakasho la'aan cagta saaray waddadii dimuqraaddiyadda isaga oo dalku uu ku yaal gobol ay siyaasaddiisa la hareen, maamullo keli-talis ah. Dhanka kale, Soomaaliya waxa ay si joogto ah ugu fashilantay in ay iska rogto heeryada qabiil wax-ku-qaybsiga ee siyaasadda, ayna u gudubto si kama-danbays ah doorasho loo dhan yahay oo qof iyo cod ah. Soomaaliyana waxa ay ahayd, waddan dimuqraadiyadda iyo doorashooyinka xorta ah hiddo u leh, kuwaas oo soo bilaabay markii gobanimada la qaatay 1960. Weliba, madaxweynihii kowaad ee dalka, Aadan Cabdulle Cismaan (Aadan Cadde), waa madaxweynihii ugu horreeyey ee Afrika ee doorasho looga adkaado, kaas oo muran la'aan aqbala in laga cod-badiyey. Madaxweyne Aadan Cadde, waxa uu weliba diidey isku dayo taageerayaashiisa ay doonayeen in ay ugu qiil-dayaan si uu xukunka u sii hayo, isaga oo uga gol lahaa in uu xididada u sii aaso, dimuqraadiyaddii curdanka ahayd.

Taariikhdaas fog oo ay Soomaalidu u lahayd doorashooyinka awgeed, waxaan adkayn in la hirgeliyo doorasho qof iyo cod ah intii afartii sanaba mar la doon-doonayo hannaan doorasho oo dani-ku-badday ah. Iyada oo

¹ Qodabka 64 iyo 72 ee dastuurka qabyada ah, aaya amraya in beelaha oo dhan si isku dheeli tiran ay mataalaad uga helaan golayaasha

wax ka yar labo sano ay ka harsan yihiin doorashooyinkii u muddaysnaa sannadka 2020-ka ee labada aqal ee baarlamaanka iyo middii madaxweynaha oo ay tahay in la qabto inta ka horraysa 8-da Febraayo 2021-ka, mar kale ayay Soomaaliya ku timid xilli ay la rafanayso su'aasha ah: ma sidii la ahaa aya lagu sii jiraa iyo hannaanka beelo wax ku qaybsiga ee 4.5 mise waxaa loo ruqaansadaa qaab-doorasheed muwaadinku yahay midka siyaasadda ku haga hannaanka doorasho ee qof iyo codka ah. Maaddaama hannaanka qabiil wax ku qaybsigu uu yahay mid aan jid iyo jaho la yaqaan lahayn, ayna adkaanayso in la is-waafajiyi in la codeeyo, haddana qabiil la tixgeliyo, isla markaana codadkaas kuraas baarlamaan loo baddelo, ma fududaanayso in la allifo hannaan doorasho oo 2020 lagu hawl-galo, iyo in qof kasta la qanciyo.¹ Xitaa haddii aysan dhacin doorasho qof iyo cod ah, ma aha in laga maago guda-galka ka xaajeysiga, hannaan heshiis lagu yahay oo ilaa xad, xor iyo xalaal ah oo lagu wejihu karo doorashooyinka 2020-ka.

Machadka Heritage waxa uu soo bandhigayaa daraasaddan, isaga oo wax ku darsanaya doodaha ka dhex socda inta siyaasadda ku leh jaangoynta ama saamaynta iyo shacab-weynahaba, kuwaas oo ku saabsan hannaanka ugu mudan ee dalku ku gali karo dorashooyin, 2020-ka. Marka aan rog-rogney maxsuulka daraasadda nooga soo baxay, isla markaana aan si qoto-dheer uu daraasayney xaaladda amni iyo midda siyaasadeed ee dalka, waxaan oran karnaa,

Jamhuuriyadda; taas ayaana keentay ku dhaqanka hannaanka awood-qaybsiga ee 4.5;

waxaa jira saddex arrin oo aad mooddo in si baahsan la isugu waafaqsan yahay:

Kow, inta badan dadka siyaasadda ka shaqeeya ee Soomaaliyeed² iyo bulshada caalamkuba³ ma taageersana in baarlamaanka hadda jira iyo xukuumaddu xiliga kororsadaan, waayo waxaa la aamminsan yahay in xilli-kororsi uu dhaawacayo aqoonsiga dowladnimada Soomaaliyeed ee ku meel-gaarka ka baxday, uuna albaabka u furayo kororsyo kale ee mustaqbalka. Waxa ayna u dhow dahay muddo ku darsi in uu khal-khal siyaasadeed horseedo, dib-u-dhac iyo ragaadinna uu u keeno geeddi-socodka iyo dhaqanka dimuqraadiyeynta dalka.

Laba, waxaa lagu qanacsan yahay in aysan suurtogal ahayn in la qaban-qaabiyo muddo-xileedka sannadka iyo barka ah ee ka hartay xukuumadda Farmaajo, doorasho dalka oo dhan ah, qof iyo cod ah oo xor iyo xalaal ah.

Saddex, waxaa kale oo si baahsan loo tilmaamayaa daraasaduna ayidaysaa, haddii ay jirto rabitaan siyaasadeed in saamileyda siyaasadeed ee dalka, sida dowladda federaalka, maamul-goboleedyada iyo xisbiyada siyaasadeed⁴, in ay weli haystaan waqtii ay ku geli karaan wada xajood rasmi ah, si ay uga heshiiyan hannaanka doorasho ee ku habboon cod-bixinta 2020-ka; maaddaama waqtii badan aanu harsanayn, waa lagama maarmaan in saamileyda iyo

saameeyayaasha siyaasaddu ay u deg-degaan go'aan ka gaarista qaabka lagu galayo doorashada soo socota.

Intii aan cilmi-baarista wadney, afar nooc doorasho oo Soomaaliya laga hirgelin karo ayaa noo soo baxday. Waxyaabo badan oo hannaan doorashooyinkaas ay ka midaysan yihiin ayaa jira, sida in ay nodqaan kuwo xisbiyo ku salaysan iyo in ay hannaan qaybsiga beelaha ee 4.5, haddaysan si dhammaystiran u dhowrin, ay qaybo ka tixgeliyaan, in kasta oo in xisbiyo siyaasadda looga hawl-galo iyo in beel wax lagu qaybsado ay yihiin laba aan meel wada geli karin. Inta badan dadka aan daraasaddan ku waraysannay, waxa ay tilmaameen in hanaanka 4.5 ee ah in qabiilka wax lagu qaybsado uu yahay mid danbeeya, oo horumarka iyo ilbaxnimada aan la jaan-qaadi karin. Sidaas oo ay tahay, in badan waxa ay haddana carrabka ku adkeeyeen, haddii la waayo doorasho qof iyo cod ah in habka 4.5 ee wax-qaybsiga uu yahay midka ugu fudud ee wax loogu qaybin karo – qaab loo dhan yahay laguna dhan yahay – dalka Soomaaliyeed ee nugul iyo Soomaalida dagaalka ka soo kabanaysa. Weliba, in kasta oo hannaanka 4.5 uu yahay mid la dhaliilo, sidaas oo ay tahay, waxaa loo arkaa mid xasiloonida qayb ka ah, waayo, waxa uu beelaha intooda badan u abuuraa dareen ah isku-dheelli tirnaan,

² Inta badan dadka siyaasadda daneeya waxa ay ka wel-welsanaayeen in dowladdu ay waqtii kororsi samayso. Xisbiyada siyaasadeed ayaa Muqdisho ku kulmay waxa ayna soo saareen baaq ka dhan ah muddo kororsi; halkaan ka eeg baaqaas: <https://goobjoog.com/aragtida-xisbiyada-ee-ku-aaddan-doorashooyinka-dalka-akhriso/>

³ Arag Security Council Resolution 2472 of 31 May 2019. Available at:
[http://undocs.org/s/res/2472\(2019\)](http://undocs.org/s/res/2472(2019))

⁴ In badan oo xisbiyada diiwaan gashan ah waxaa loo yaqaan ururo maaddaama aanay buuxin shuruudihii xisbiyada ee dastuurka ku qornayd; in badan oo ururadaas ahna waa xisbi nin siyaasi ah uu horboodayo oo ka fog, wixii xisbiyo lagu yaqaannay.

maaddaama ay meesha ka maqan tahay qaab wax qaybsi oo la isla ogol yahay.

In kasta oo aan ku dadaalney noocyada doorasho ee Soomaaliya ay qaadan karto 2020-ka in aan afar nooc isugu duwno, haddana xaqiiqadu waxa ay tahay in doorashooyinka (dimuqraaddiga ah) ee caalamku ay raacaan habab la yaqaan sida matalaadda isku dheeli tiran (proportional representation), nooca hal-dheerida ah iyo doorashada isku-dhafka ah. Saddex ka mid ah noocyada doorasho ee ay daraasaddu soo bandhigtay ee ay Soomaaliya qaadan karto, waxa ay la bah ama nooc yihiin hannaankaa matalaadda isku dheeliga tiran, halka nooc-doorasheedka 4-aad uu la qaab yahay hannaanka hal-dheerida lagu kala guulaysto.

Caqabadda Soomaaliya la hartay, loogana baahan yahay in ay casriyayso waa qaabka siyaasadeedka dalka, oo waa in laga koraa in siyaasaddu hayb ku salaysnaato.

Si ay dalka uga dhacdo doorasho hufan, xor, xalaalna ah (hadday doonto yaysan noqon middii caalamku yaqaanneey ee qofka iyo codka ahayd), afarta nooc-doorasho ee aan soo bandhignay, waxa aan ku salaynay shuruudaha ama hal-beegyada hoose:

- Noocii doorasho ee la qaataaba waa in uu noqdaa mid aan uga sii darayn xaaladda Soomaaliya;
- Hannaankii codayn ee lagu heshiyaaba waa in uu dalka saaraa, waddadii gaarsiin lahayd, doorasho qof iyo cod ah;
- Habkii doorasho ee lagu dhaqmayo 2020 waa in lagu dhan yahay gaarahaan haweenka iyo iyo dadka laga tirada badan yahay waa in ay helaan matalaadda ay mudan yihiin;

- Nooca doorasho ee 2020-ka la qaadanayo waa in uu ku salaysnaadaa hannaanka xisbiyada;
- Noocii doorasho oo la qaato waa in uu yahay mid la hir-gelin karo, oo suurtogal ah
- Noocii doorasho oo lagu heshiyo waa in uu noqdaa mid dad badan ay codayn karaan;
- Noocii doorasho ee 2020-ka dalku isticmaalayo waa in uu noqdaa hannaan ku yimid wadahadal iyo isla-qaadasho ay heshiis ku yihiin saamileeyda siyaasadda dalka;

Waxa aan saamileeyda (stake-holders) siyaasadda dalka u naqaan: xukuumadda, labada aqal ee baarlamaanka, maamul-goboleedyada iyo xisbiyada siyaasadeed ee diiwaangashan. Hannaanka doorasho oo la raacayo, waxaa kale oo uu u baahan doonaa in uu yahay mid deeq-bixiyayaasha dimuqraadiyadda ku dhisan ay maal-gelin u quuraan, hufnaanna ay ka dhextarki karaan.

Nooc-doorashaadkii la doono halla qaatee, waxa aan is qaadan karin doonidda in badan oo Soomaalida ka mid ah ay doonayaan in xisbiyo loo gudbo iyo in hannaanka wax-qaybsiga ee 4.5 lagu sii socdo. In hannaanka xisbiyada si sax ah loo guda galo, looguna shaqeeyo iyo in beel kasta ay hesho xildhibaanada ay hadda haysato waa arrin aan la is waafajin karin, waana arrin jaah-wareer u keenaysa xisbiyada siyaasadeed iyo musharixiinta doonaya in la doorto. Si kastana xaalku ha noqdee, baahida loo qabo doorasho hufan iyo in xasiloonida lagu dadaalo iyo is-wadashada Soomaalida ayaa khasbaysa farsamo-cilmiyaysan iyo isku-tanasul lagu hawl-galo,

nooca doorasho haba noqdee, mid aan ahayn, qof iyo cod, balse ah mid lagu meel-gaari karo ama loo qaateen ah.

Ugu danbayn, noocuu doono ha noqdee, si mid ka mid ah afarta nooc loo hirgeliyo, waxaa lagama maarmaan ah in in saamileyda iyo saameeya-yaasha siyaasadda Soomaaliya ay wadatashi galaan, hal hannaan-doorashana ku heshiyaan. Haddii wada-xaajood iyo heshiis la waayo, waxa ay taasi alaabka u furaysaa dowladda Soomaaliya (xukuumad iyo baarlamaanba) in ay lumiyaa citiraafka, in uu xumaado xiriirka saamileeyda (dowladda dhexe, gobolada iyo xisbiyada) iyo in ay suurtagal noqoto in ay bilaabato xasilooni darro salka ku haysa loolan awood iyo khayraad.

Qaabka cilmi-baarista loo sameeyey

Machadka Heritage, inta uu ku guda jiray macluumaad ururinta cilmi-baaristan, waxa uu si wada jir ah u isticmaalay hannaanka waraysiga (interviews) iyo habka eegidda macluumaadkii horay looga diyaariyey mawduuca (archival research). Waxa aan waraysannay siyaasiyiin badan oo Muqdisho ku sugaran doorashooyinkana u dhuun daloola ama daneeya; sidoo kale waxa aan waraysiyo Garowe uga qaadnay wufuud ka kala timid dhammaan maamul-goboleedyada oo halkaas u tagey caleemo saarka Madaxweyne Siciid Cabdullahi Deni oo ku guuleytey doorashada Puntland.⁵ Cilmi-baarayaashayadu waxa ay tageen gobollada iyaga oo la kulmay inta badan madaxda gobolada iyo masuuliyiin sare. Cilmi

⁵ Garowe Online, Attention turns to Garowe as Puntland to inaugurate new president.

Available at:

<https://www.garoweonline.com/en/news/puntland/somalia-attention-turns-to-garowe-as-puntland-to-inaugurate-new-president>

baarayaashu waxaa kale oo ay daraaseeyeen dukmitiyo kaydsanaa, joornaalo hore iyo warbixinno laga qoray Soomaalida iyo doorashooyinka heer qaran laga soo bilaabo sanadihii kontomaadkii intaan xorriyaddaba la qaadan. Cilmi-baaristu waxaa kale oo ay eegtag doorashooyinkii Somaliland iyo heshiisyadii siyaasadeed oo ka warbixinaya hannaan-doorasheedyada halkaa ka hirgalay.

Fahmida hannaan doorasheedyada

Hannaan doorasheedyadu waa qayb ka mid ah shuruuc guda-weyn oo hagga dhammaan qaybaha doorashooyinka, sida in lagu dhawaaqo doorasho dhicided, in la qeexo cidda coday karta iyo sida xisbiyadu ay u samayn karaan ol-ole tartan.⁶ David Farrell, oo xeel dheere ku ah arrimaha doorashooyinka, waxa uu tilmaamay in hannaanka doorasho ‘uu go’amiyo qaabka codadka loogu badelo kuraas si loo doorto siyaasiyiin’⁷. Dowladaha hannaanka dimuqraadiyaddu ay ku cusub tahay, xulashada hannaanka doorasho ee dalka ayaa ah go’anka siyaasadeed ee ugu muhiimsan ee ay dowladi qaadato.⁸ Khabiirka kale ee Donald L Horowitz isna waxa uu tilmaamaa nooca doorasho ee la qaato, waa go’aan siyaasadeed. Wuxuu qoray, ‘in nooc kasta oo hab-doorasho ah uu hababka kale wax badan uga duwan yahay, macnaheeduna uu yahay in madaxda samaynaya kala xulashada hannaan doorasheed oo mid kale ka door-bidaya,

⁶ Arag David M Farrell. (1997). Comparing electoral systems. London: MacMillan Press, (p. 5).

⁷ Lamid

⁸ See Reynolds et. al, *Electoral system design*, p. 6.

in ay kala faddalid iyo kala doorasho ay samaynayaan, taasina ay tahay go'aan siyaasadeed ama arrin cid u danayn balse aanay ahayn, arrin iska dhacday.⁹

Horowitz waxa tilmaamay lix hadaf ama ujeeddo oo dadka hannaan doorasho diyaariya (khuburo ama siyaasiyiin) ay isku dayaan in ay xaqijiyaan ama ay maanka ku hayaan; lixda hadaf, afar ayay cilmi-baaristani muhiim u aragtaa:

- Waxa uu Horowitz tilmaamay in mabda'a isku dheelli-tirka uu muhiim yahay markii codadka kuraas loo rogayo (micnaha, haddii dadka codeeyey 35% ay xisbi codkooda siiyeen, waa in xisbigaasi uu helo 35% kuraasta baarlamaanka); waxa uuna Horowitz lee yahay, markii codadka dadka iyo kuraasta lagu helayo ay isku jaan-go'naato ama isku dheelli-tirnaan ay u sii dhawaataba, waxa ay astaan u tahay in hannaan doorasheedku uu yahay mid caddaalad ah;
- In siyaasiyiinta codka la siinayo ay yihiiin kuwa codeeyayaashu ay la xisaabtami karaan iyana waa arrin muihiim ah; hannaan doorashooyinka qaar sida midda xukuumaddu taageerayso ee xisbiyada liiska xiran, waxa ay dhantaali kartaa in xildhibaanada lala xisaabtamo maaddaama dadku ay xisbiyo kala dooranayaan ee aanay mushraxa xildhibaanka noqonaya aysan si toos ah ugu codayneyn; in xisbi la doortaana, waxa ay ka hor

istaagaysaa in dadku ay helaan xildhibaan ay la xisaabtami karaan;

- Waxaa kale oo uu Horowitz carrabka ku adkeeyey in xaqijinta dowlad waarta ama helidda xasillooni siyaasadeed ay tahay arrin kale oo ay maanka ku hayaan dadka diyaariya hannaanka doorasho ee dal. Waayo hannaan doorashooyin ayaa dhaliya dowlado aan xasillayn iyo in lagu khasbanaado in xisbiyo kala aragti duwan ay hab is-gaashaan-buursi ah ay wax u wada maamulaan; tusaale ahaan Talyaaniga todobaatankii sano oo la soo dhaafay lixdan dowladood ayaa soo martay;
- Ugu danbayna, waxaa ahmiyad gaar ah u leh dadka hannaan doorasho diyaarinaya dib-u-heshiin iyo wada-shaqaynta hoggaanka bulshada, gaar ahaan bulshooyinka qaybsan. Qodobkaanna ahmiyad gooni ah ayuu Soomaaliya u leeyahay; waxa uuna Horowitz ku doodaa, in haddii hannaanka doorasho uu caawinayo nabad-doonada iyo afkaaraha dhex-dhexaadka, in markaasi ay dib-u-heshiisiinta taabba qaadayso oo meesha dhexe siyaasadda lagu ciyaarayo;¹⁰

Sida ay tilmaameen khubarada kale ee Grofman and Lijphart, dadka dal u dajinaya hannaan doorasho waa in ay 5 su'aalood ka jawaabaan ama xal u helaan.

Kow, hannaan-doorasho nooceee ah ayaa dalkaan ku habboon (hal-dheeri, matalaadda isku dheeli tiran, hab isku dhaf ah? Labo,

⁹ Donald L Horowitz. (2006). A primer for decision-makers, In Larry Diamond & Marc Plattner, Electoral Systems and Democracy, Biltmore: Johns Hopkins University, p. 4.

¹⁰ Donald L Horowitz. (2006). A primer for decision-makers, p. 6.

dadku ma xisbiyo ayay dooranayaan mise xildhibaan kaligiis ah? Saddex, deegaan doorasheed kasta meeqo kursi ayaa yaal? Afar, waa imisa caddadka baarlamaanku? Shan, waa maxay tirada ugu yar (threshold) ee xisbiyada laga doonayo si ay kuraas u helaan?¹¹ Dhammaan su'aalahaas waa kuwa Soomaaliya u yaalla loona baahan yahay in xal loo helo.

Hab-doorashooyinka ah hannaanka cod-is-dheerida inta badan kursi kastaa waxa uu yaallaa hal deegaan-doorasho, masharixii ugu cod bata ayaana guulaysta oo kursiga qaata. Tusaale ahaa, deegaan doorasho sida Afgooye ama Qardho oo kale ah haddii ay shan mushrax ku tartamaan, haddii masharaxa koowaad uu helo boqolkiiba soddon codadka dadka codeeyey, musharaxa 2-aadna uu helo 25%, kan saddixaadna 20% midka afraadna helo 15% codadka kan 5-aadna uu helo 10% codadka habkan cod dheeridaah, kursiga waxaa qaadanaya musharaxa u horreeya ee helay 30% codadka iyada oo ay caddahay in 70% codadkii ay meel kale mareen. Waana arrintaan sababta habkaan magaca kale ee loo yaqaan uu yahay, ‘kii ugu horreeya ayaa, guusha leh’ (First Past the Post). Hal faa’ido oo uu hannaankani leeyahay waa in uu fudud yahay in la fahmo lana hirgeliyo. Sanadkii 2005, Xisbiga Xoogsatada ee Ingiriiska ayaa kuraasta baarlamaanka Ingiriiska oo ahayd 646 kursi helay intii badnay ama 355 kursi, in kasta oo codka dadweynaha uu xisbigu helay 35.2%.¹² Dalalka kale ee dimuqraadiga ah ee habkaan cod is dheerida ku dhaqma waxaa ka mid ah Maraykanka iyo Kanada.

Marka lagu dhaqmayo hannaan doorasheedka matalaadda isku dheelli tiran, kuraasta baarlamaanka waxaa loo qaybiyyaa

boqolley u dhiganta xisbi kasta intii uu cod helay. Hannaankaan aalaaba, doorasho-deegaan kasta sida Jawhar ama Kismaayo waxaa oolli kara kuraas badan. Haddii Gaalkacyo la geeyo 10 kursi, oo Xisbiga A uu helo 40% tirada codadka dadweynaha, Xisbiga B uu isna helo 30%, Xisbi C uu isna helo 20% isla markaana uu Xisbi D helo 10% codadka, markaa xisbiga A, waxa uu helayaa 4 kursi, Xisbiga B-na 3 kursi, Xisbiga C isna waxa uu helayaa 2 kursi halka Xisbiga D-na aanu waxba helayn.

Dalalka dimuqraaddiga ah baddankoodu waxa ay isticmaalaan hannaanka matalaadda isku dheeli tiran oo deegaan doorasho kasta ay kuraas badan taallo. Waxaa ka mid ah Turkiga, Talyaaniga iyo Denmark. Dalalka isticmaala hannaanka matalaadda isku dheelli tiran, waxa ay leeyihiiin shuruud xaddidaysa inta cod ee ugu yar ee xisbi looga baahan yahay in uu helo, si uu baarlamaanka kuraas ugu yeesho. Dal kastaana tiro gooni ah oo cod ah ayuu ku xiraa, in xisbigu helo si uu u noqdo mid la aqoonsan yahay oo baarlamaanka xisbi ahaan uga tirsan. Dalka Turkiga, xisbi kastaa waa in uu helaa ugu yaraan 10% (boqolkiiba tobant codadka) dadka codeeyey si xisbi loogu aqoonsado, uuna kuraas u helo; inta badan dalalka Yurub shuruudda xisbiga laga rabaa waa wax kayar boqolkiiba shan. Soomaaliya, sharciga dhawaan golaha wasiiradu baarlamaanka u soo gudbiyeen aanse la ansixin, waxa uu shuruudda aqoonsiga xisbiyada ka dhigayaa in uu helo 7% codadka rasmiga ah. Taas micnaheedu waxaa weeye in xisbigii ku guuldarraysta in uu kasbado 7% codka dadka codeeyey aan baarlamaanka xisbi ahaan looga aqoonsan. Sida caadiga ah, markii shuruudda xisbinimada tiro sarraysa lagu

¹¹ Bernard Grofman & Arendt Lijphart, 2003, Electoral law and their political consequences, vol. 1, Algora Publishing

¹² Arag Arend Lijphart (2004). Constitutional design for divided societies. *Journal of democracy*, 15(2), 96-109.

xiro, waxaa yaraanaya oo la xaddidayaa xisbiyada baarlamaanka ka tirsan.

Shuruudda tirada ku salaysan ee noocaan ah waxaa badanaa loogu tala galay in lagu xakameeyo kooxaha xagjirka, gooni-goosadka ah ama cunsuriyadda aaminsan si aanay baarlamaanka u soo gelin. Dalalka colaadaha ka soo kabanaya sida Soomaaliya oo kale, boqolkiiba 7% codka waxaa loo arki karaa tiro sarraysa oo waxa ay matalaadda ka hor istaagaysaa xisbiyada yaryar iyo deegaanada iyo dadka ay matalayaan.

Waxaa kale oo looga baahan yahay dadka jaan-goynaya hannaanka doorasho ee dal uu qaadanayo in ay go'aan ka gaaraan qaab-xisaabeedka codadka hab boqolley iyo celcelis ah xisbiyada wax loogu qaybinayo kaddibna codka loogu baddelayo kuraas. Sida uu tilmaamay khabiirka David Farrell, hababka boqoleyda xisaabeed ee qaybiska oo ah hababka kala duwan ee matalaadda isku-dheeli tiran kuraasta loogu kala helayo waxaa ay u kala baxaan laba qaab cel-celis iyo qaybis oo lagu kala magacaabo ‘haraaga ugu badan’ (largest remainder) iyo ‘celceliska ugu sarreya’ (highest average), mid kii la isticmaalaana, cid baa faa’ido ku qabta, ha noqoto xisbiga ugu codad badan ama midka ugu codad yar. Qaab-cel-celiska loogu yeero *Hare, Droop & Imperiali* waxa ay hoos yimaadaan qaab xisaabeedka harraga ugu badan (largest remainder system), meesha qaabka qaybinta iyo cel-celiska ee *Sainte Lague, Modified Sainte Lague* iyo *D'Hondt*

¹³ Eeg David Farrell, Comparing Electoral Systems, p. 62.

¹⁴ Arend Lijphart. (2004). Constitutional design for divided societies, p. 106.

¹⁵

http://www.parliament.gov.so/images/Downloads/Dastuurka_ku_meelgaarka_SOM_0309_2012-1_2.pdf; Qodobka 72-aad waxaa ku jira saddex faqro oo iska hor imaanaysa. Mar waxa uu qodobku leeyahay saddex kursi ayuu

ay ka mid yihiin hannaanka xisaabinta ee celceliska ugu sarreya.¹³ Xukuumadda Soomaaliya xeerka doorasho ee ay soo bandhigtay waxa uu ku talinayaa in la raaco hannaanka *Sainte Lague*, inkasta oo qaab-xisaabeedkaasi uu yahay mid in la fahmaa ay adag tahay, aanna aad loo isticmaalin. Waxaa Soomaaliya uga habboon inla isticmaalo hannaanka ‘haraaga ugu badan’ sida qaabka *Hare*.

Jaan-gooyayaasha hannaanka doorasho waxaa kale oo ay ku khasban yihiin in ay go'aan ka qaataan tirada xildhibaanada. Rein Taagepera ayaa soo bandhigay hannaan uu u bixiyey ‘cube rule’ hannaankaas oo isku – dayaya in tirada baarlamaanka lagu jaan-goynayo tirada guud ee muwaadiniinta. Sida Lijphart uu sheegayna, haddii xeerkaas lagu eego Ciraaq (oo tirada dadkeedu yihiin 25 milyan), tusaale ahaan, hannanka ‘cube rule’ waxa oranaya celcelis ahaan waxaa Ciraaq ku habboon in baarlamaankoodu noqdo,¹⁴ xubnood.

Soomaalidu waxa ay ku heshiyeen baarlamaan ka kooban 275 xubnood iyo Aqal Sare oo 54 xubnood ah. Qodobka 72 ee dastuurka qabyada ah ee Soomaaliya, 18-kii gobol ee Soomaaliya ka koobnaan jirtey, midkasta waxa uu u asteeyey saddex xubnood oo xubnaha aqalka sare ah. Iska hor imaad ka jira qodabkaas dastuurkaayaase hirgelintiisa ka dhigaya mid aan suurto-gal ahayn, haddaan is baddel lagu samayn.¹⁵ Doorashadii 2016-ka,

leeyahay gobol kasta oo katirsan 18-kii gobo lee Soomaaliya ay ahayd dagaalka ka hor; wuxuu kaloo leeyahay waa in maamul-goboleedyadu ay helaan tiro is-leg oo kuraas ah(kuwaas oo shan maamul-goboleed hadda ah lix haddii Banaadir lagu daro ama 7 haddii Somaliland lagu daro) kuwaas oo ay ku dhaan yihiin dhammaan qaybaha bulshada iyo; in

kuraastii waxaa lagu qaybsaday qaab maamul goboleed ah in kasta oo hannaanka wax-qaybsiga beelaha ee 4.5 isna si buuxda loogu dhaqmay. Dastuurka qabyada ahina, waxa uu ku baaqayaa in qaybinta kuraasta Aqalka Sare la waafajiyo qodobka 72-aad ee dastuurka.

Lijphart waxa uu dhiirri-geliyaa in dadka dejinaya hannaanka doorasheeda in si gooni ah saddex arrimood isha loogu hayo: nooca iyo daruufaha bulshada (ma dad aad u qaybsan baa mise waa dad hal nooc ah oo aan kala irdhoobin), khibradda ay saamilaydu iyo saamayn-leydu u leeyihii hannaanka dimuqraadiyadaya, iyo sida uu caddaalad ugu dhisan yahay hanaanka la isku matalayo.

Khibradda Soomaalida: Doorashada iyo Xulidda Siyaasiyiinta

Ilaa xilligii gumeysiga ee 1950 – 1960-kii, Soomaaliya waxaa soo maray baarlamaanno iyo dowlado lagu dhisay hannaan xulid iyo mid doorasho labadaba.¹⁶ Golihii deegaanka (Territorial Council) ee 1951 ayaa ahaa gole-dowladeed kii ugu horreeyey,¹⁷ kaas oo matalayey dhulka Soomaaliyeed ee Qaramada Midoobey ay Talyaaniga u wakiisheen in tobant sano gudahood xorriyad la gaarsiiyo. Tirada golahaasina waa uu kordhayey, isaga oo ugu danbayn gaaray 35

tira kuraasta Aqalka Sare aanay 54 kursi kor u dhaafin.

¹⁶ Maarten Halff has compiled all of the electoral laws in an edited volume that is available electronically

¹⁷ Saadia Touval, *Somali Nationalism: international politics and the drive for unity in the Horn of Africa*. iUniverse, 19

xubnoood, kuwaas oo guddoomiyaha Talyaaniga ah oo dhulka xukuma oo si iskiis ah u xulan jiray isaga oo aan u marin hab la yaqaanno.¹⁸ In kasta oo ay xisbiyo badan jireen xilligaas, sidaas oo ay tahay inta badan wakiilada golaha deegaanka ku jira waxa ay u badnaayeen hoggaanka dhaqanka ama kaabo-qabiillo. Sida uu sheegay Touval, 7 wakiil ayaa loo qoondeeyey xisbiyada, waxaana golahaas deeganka isku dubbaritey xisbigii SYL. Golahaas deegaanka ee 1951 la sameeyey ma lahayn wax awoood sharci dejin ah, awooddoodu waxa ay ku sinnayd oo kaliya, talo siin goddoomiyaha Talyaaniga ah.¹⁹

Guddoomiyahaas Talyaaniga ayaa sameeyey – isaga oo la tashanaya golaha deegaanka iyo guddi Qaramada Midoobey ku lifaaqay – lix gobol iyo 30 degmo. Laba doorasho deegaan iyo laba doorasho guud ayaa dalka ka dhacay, tobankii sano ee Talyaanigu Soomaalida gacanta ku hayey, kuna amranaa in uu madaxbannaani gaarsiiyo tobant sano gudahood.²⁰ Maamulkaas Talyaanigu waxaa kale oo uu xeerihey shuruuc siinaya kuraas matalaad dadka reer miyiga ah iyo dadka aan Soomaalida ahayn ee dalka ku noolaa.²¹ Doorashadii guud ee 1956, dadkii ku noolaa magaalooyinka, doorasho qarsoodi ah oo sanduukh ah ayay ku codeeyeen. Baadiyaha oo ah meesha ay inta badan Soomaalidu ku noolaayeen,

¹⁸ Mohamed Issa Trunji. *Somalia: The Untold History 1941-1969*. Looh Press, 2015

¹⁹ Castagno, Alphonso A. "Somalia." *International Conciliation*, Vol. 32 (1959): 339

²⁰ Maarten Halff, 2016; Castagno, 1959

²¹ Arag Ordinance no. 5 of 30 March, 1955; Ordinance no. 6 of 31 March 1955: Election of the Territorial Council [Legislative Assembly]; and Decree no. 215 of 26 November 1955.

qabaa'ilka ayaa shirar isugu imaanayey iyaga ayaana kaaba-qabiilka ama qof kale oo ay idmadeen u wakiilan jiray in uu ku soo codeeyo magacooda.

Haweenka iyo ragga 21 sono ka yar looma ogolayn in ay tartamaan ama codeeyaan.

Sida lagu tilmaamay warbixinta gudiga la Talinta ee Qaramada Midoobey ee dhulka Soomaalida ee Talyaanigu uu maamulayey, doorashooyinkaas waxaa ka muuqday musuq-maasuq, gadashada codadka iyo buun-buunis tirada beelalaha, kuwaas oo nuxur tiray doorashadaas.²²

Xiligaas tirada dadka ku nool Koofurta Soomaaliya waxaa lagu qiyaasay 1,270, 000 oo qof, sidaas oo ay tahayna dadka ka codeeyey baadiyaha waxa uu ahaa 772, 183. In kasta oo wax is-daba-marin iyo buun-buunis tirada qabaa'ilka ay jirtey, madaxii maamulka Talyaaniga ayaa go'aamiyey in kursi kasta uu matalayey 14,302 oo qof.²³ Sidaas darteed, doorashadii 1956 waxaa ka dhashay in la doorto 70 wakiil, 60 ka mid ay qabaa'ilka Soomaali yihiin, 4-na ay Talyaani ahaayeen, 4 kalana Carab iyo hal wakiil oo Hindi iyo xildhibaan Pakistaani ahaa.²⁴ Xisbigii SYL waxa uu doorashadaas ku helay 43 xildhibaan, halka Xisbiga Digil iyo Mirifle uu helay 13 cod, 4-ta kursi oo Soomaalida u soo hartayna waxaa qaybsaday ama kala lahaa xisbiyo yar yar.

Khaladaad badan ayaa ka jirey doorashadaas 1956-dii. In kasta oo madaxa Maamulka ee Talyaaniga ahaa uu kuraasta gaarsiiyey 90 xildhibaan, gobolada dalka iyo degmooyinka isma baddelin ilaa 1960-kii (oo waxa ay ahaayeen 6 gobol iyo 30 degmo). Wixii ka danbeeyey 1958, marka laga reebo, afar deegaan-doorasho, dhammaan degmooyinka dalka waxaa laga dooranayey laba kursi ama wax ka badan. Hannaanka doorasho oo la isticmaalayeyna waxa uu ahaa matalaadda isku dheeli tiran, oo xisbiyadu ay liis xiran oo xildhibaanno ah ku tartamayeen.

Doorashadii guud ee labaad ee baarlamaanku waxa ay dhacday 1959. Doorashadu waxay ay ahayd dalka oo dhan (intii Talyaanigu xukumey) iyo qof iyo cod; wax badan ayaa laga hagaajiye sharciga doorashada; haweenka waa loo ogolaa in ay codeeyaan, da'da codayntana waxaa laga dhigay wixii 18 ka weyn; sanduukh qarsoodi ah ayaana lagu codaynayey. Waa la joojiyey kaaba-qabiilada in ay codeeyaan iyaga oo beeshooda wakiil ka ah. Xeerka doorashaduna waxa uu dhigayey in hannaanka doorashadu ay tahay matalaadda isku dheeli-tiran ee liiska xisbiyada ee xiran.²⁵ Inta badan xisbiyada mucaaradka ah waa ay qaadeceen doorashadaas, saddex xisbi oo kaliya ayaana kuraas helay: 83 kursi ayay SYL ku guuleystey. Waxaa lagu tartamay 29 kursi oo kaliya, 61 kalana waxaa u taagnaa hal musharax.²⁶

²² Saadia Touval, 1963; Alphonso Castagno, 1959

²³ Arag T/1245 - The report of the United Nations Advisory Council for the Trust Territory for Somaliland under the Italian administration, p. 12.

²⁴ Alphonso Castagno, 1959; Mohamed Trunji, 2016.

²⁵ *Arag warbixinta the Report of the United Nations Advisory Council for the Trust Territory of Somaliland under Italian Administration, Annex III, UN document T/1444 of 14 April 1959*

²⁶ Mohamed Haji Mukhtar. "The Emergence and Role of Political Parties in the Inter-River Region of Somalia from 1947-1960." *Ufahamu: A Journal of African Studies* 17, no. 2, 1989.

Dhulkii Soomaalida ee Ingiriisku gumaysanayey ee loo yaqaannay British Somaliland, iyaduna waxaa ka jiray isbeddello siyaasadeed dhammaadkii 1950-maadkii. Sida uu qoray Touval, maamulkii Ingiriiska kaddib markii uu culays kaga yimid wareejintii ay dhulkii Hawd (Soomaali Galbeed) ku wareejiyeen Itoobiya, waxa ay 7 qof oo Soomaali ah u magacaabeen baarlamaankii 1957, kuwaas oo awooddoodu ku ekayd la talin. Xeerkii No. 9 ee 1958 oo ahaa xeer doorasho oo dhamaystiran ayaa la ansixiyey si loogu maamulo doorashooyinka, kuwaas oo loo asteyey in ay ka dhacaan 33 deegaan doorasho, doorashadaas oo ku salaysnayd hannaanka doorashada ee cod is dheerida ama mashuraxa ugu cod badan ay guushu raacayso.²⁷ Ragga kaliya ayaana loo ogolaa in ay doorashadaas ka qayb-qaataan. Maddaama Soomaalida badankeedu ay miyiga ku noolaayeen, sharcigaas doorasho waxa uu lahaa qaab ay reer miyigu u codayn karaan.

Millman oo ka warramaya qaab-kaas waxa uu tilmaamay, laba qaab oo lagu coddbynayey oo reer magaal iyo reer miyi ah; labada hannaan oo ay ku coddbynayeen ayaa sharciga lagu qeexay. Baadiyaha, doorashadu waxa ay ka dhacaysay shirkha qabaa'ilka oo hab taageero ah codka lagu bixinayey, magaaloooyinkana, cod sir ah oo sanduuq la dhigayo ayaan lagu codeynayey.²⁸ Febraayo 1960, saddex xisbi ayaan kuraas doorashadaas ka helay, Somali National League (SNL) oo 20 cod helay, United Somali Party (USP) oo 12 cod helay iyo National United Front (NUF) oo hal cod helay.²⁹

1-dii Juulay 1960-kii, Jamhuuriyad Soomaaliyed oo madax-bannaan,

²⁷ British Somaliland: The Legislative Council (Elections) Ordinance, 1958 (Ordinance No.9 of 1958)

midaysanna ayaa ka dhalatay isu-taggii koofurta iyo waqooyiga Soomaaliya ee xoroobey. Waqtigaas, koofurta Soomaaliya ee Talyaaniga ka xoroobey waxa ay lahaayeen 90 xildhibaan, kuwaas oo lagu doortay hannaanka xisbiyadu ay ku tartamayaan liiska xisbiyada ee xiran ee matalaadda isu dheelli tiran. Dhulkii woqooyi ee Ingiriiska ka xoroobey iyana waxa ay lahaayeen 33 xildhibaan, kuwaas oo lagu soo doortay deegaan-doorashooyin mid kasta hal mudane laga soo dooranayey, hannaanka hal is-dheerida ama masharaxa ugu cod ka badan ay guusha raacayso. Jamhuuriyaddii dhalatay ee Soomaaliyed waxa ay qaadatay hannaankii doorasho ee koofurta ee liiska xiran ee xisbiyada ay ku tartamayaan qaabka matalaadda isu dheelli tiran.

Doorashadii 1964-tii, sharci doorasho oo cusub (Sharci No. 4) ayaa lagu maamulay doorashadaas. Sharciga cusub in kasta oo sidoodii uu u daayey 33-kii kursi ee woqooyiga looga tartamayey iyo 90-kii koofurta, sharciga cusub waxa uu asteyey 12 deegaan doorasho ee Burco iyo Hargeisa ah oo kuraas mid ka badan la dhigay. Haddaba, 123-kii kursi ee baarlamaanka, Xisbigii SYL waxa uu doorashadaas ku guuleystey aqlabiyyad 69 ah. Somali National Congress (SNC) ayaan xisbiga labaad noqday oo helay 22 kursi.³⁰ Madaxweyne Aaden Cabdulle waxa uu magacaabay Ra'iisul Wasaare, in kasta oo uu horraantii ansixinta culays kala kulmay, baarlamaannku waa ansixiyey xukuumaddi Cabdirizaaq, kaddib markii u wax ka baddeley qaabka uu u dhisay golaha wasiirada.

²⁸ Brock Millman. *British Somaliland: An Administrative History, 1920-1960*. Routledge, 2013, p. 271

²⁹ Touval, Somali Nationalism, 1963, p. 106.

³⁰ Trunji, The Untold History, p. 471.

Tusmada 1: Gobolada iyo kuraasta (1959)

Gobol	Inta degmo	Kuraasta
Banaadir	8	18
Hiiraan	2	12
Mudug	4	13
Majerteeniya	6	13
Jubbada Sare	6	22
Jubbada Hoose	4	12
Burco	7	16
Hargeysa	5	17
Wadar guud	42	123

Doorashadii 1968, baarlamaanka ayaa ansixiyey sharci doorasho (Sharciga No. 13 ee 6 Juun 1968) ee ciwaankiisu ahaa Doorashooyinka Siyaasadeed iyo Doorashooyinka Deegaanada, si sharcigaas uu u hago doorashada deegaanada iyo midda guud. Sharciga cusub waxaa uu inta badan la mid ahaa sharciyadii lagu maamulay doorashooyinkii hore. Laakiin sida uu qoray, Halff, xisbigii talada hayey ee uu hoggaaminayey Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaarke iyo Ra'iisul Wasaarihiisa Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, ayaa ka shaqeeeyey in isbeddel lagu sameeyo shuruuddii xaddideysey tirada cod ee u ogolaanaysa in xisbi uu baarlamaanka ka dhex-jiro helana oqoonsi, iyaga oo sharcigaas baarlamaankana marsiiley, taas oo ujeedadu ahay in ay baaba'aan xisbiyada yaryar.³¹

Xisbi kasta oo hela wax ka yar tirada cod ama kuraas ee sharci tilmaamay, waxa uu ka harayey tartanka, sida sharciga cusubi uu dhigayey, kuraastiisana waxaa loo kala qaybinayey xisbiyada kale. In kasta oo ay ahayd arrin buuq dhalisay, SYL waa ay ansixisay isbeddel-samayntaas sharci. Sdaas oo ay ahayd, xisbiyada doorashadii 1969 tartamay, kor ayay u keceen oo waxa ay noqdeen 64.³² Markaanna, SYL waxa ay heshay 73 kursi halka SNC ay heshay 11 kursi, oo keliya.

³¹ Halff, The Electoral Legislation of Somalia, p. 189

³² Trunji, The Untold History.

Jaantuska 2: Degmooyinka iyo kuraasta

Jubbada Hoose	Jubbada Sare	Banaadir	Hiiraan	Mudug	Majerteeniy a	Burco	Hargeys a
Kismaayo 3 kursi	Baydhaba 6 kursi	Muqdisho 2 kursi	Belet- Weyn 5 kursi	Gaalkaa cyo 4 kursi	Boosaaso 2 kursi	Burao 5 kursi	Hargeisa 6 kursi
Afmadow 4 kursi	Buur-Xakaba 6 kursi	Marka 3 kursi	Bulo-Burde 7 kursi	El-Bur 4 kursi	Qandala 1 kursi	Odweyne 1 kursi	Gabiley 1 kursi
Margherita (Jamame) 3 kursi	Xuddur 4 kursi	Villabruzzi (Jowhar) 3 kursi		Dhusa- Marreeb 3 seats	Alula 1 kursi	Ceerigaabo 2 kursi	Borama 3 kursi
Jilib 2 kursi	Diinsoor 2 kursi	Itala (Cadala) 3 kursi		Hobyo 2 kursi	Isku-Shuban 2 kursi	Laas-Qoray 2 kursi	Zeylac 2 kursi
	Baardheera 2 kursi	Baraawe 3 kursi			Qardo 3 kursi	Gar-Adag 1 kursi	Berbera 5 kursi
	Lugh Ferrandi (Luuq) 2 kursi	Afgoye 2 kursi			Eyl 4 kursi	Laas Caanod 3 kursi	
		Wallaweyn 1 kursi				Buuhoodle 2 kursi	
		Balcad 1 kursi					
4 degmo 12 kursi	6 degmo 22 kursi	8 degmo 18 kursi	2 degmo 12 kursi	4 degmo 13 kursi	6 degmo 13 Kursi	7 degmo 16 kursi	5 degmo 17 kursi

Dowladnimadii Soomaaliyeed ee dimuqraaddiyadda ku dhisnayd waxa ay istaagtey 21 Oktoober 1969, kaddib lix bilood doorashadii. Kaddibna dowlad milateri ah ayaa dalka xukuaysey 21 sono ilaa 26 Janaayo 1991. Xiligaas hoggaanka milateriga, waxa ay laaleen dastuurka, waxa ay sameeyeen baarlamaan magac-u-yaal ah, waxa ay mabnuuceen xisbiyada siyaasadeed

iyaga oo xabsiga dhigay siyaasiyiintii. Xukunkii milateri ee uu hoggaaminaeyey Maxamed Siyaad Barre, waxa uu si kordhiyey gobooladdii iyo degmooyinkii, isaga oo 8-dii gobol ka dhigay 18, 42 degmanaa gaarsiiyey 92 degmo.³³ Xukunkii milateriga ayaana dalka oo dhan u magacaabayey guddoomiyayaalka gobolada,

³³ Afyare Elmi, Understanding the Somalia conflagration: Identity, Political Islam and Peacebuilding. London: Pluto Press. (2010).

kuwa degmooyinka iyo dhammaan madaxda dalka.

Caburinta xukunka milateri ee keli-taliska ahaa iyo xukunkii oo xarunta dowladda ee Muqdisho lagu soo koobay, ayaa waxaa ka dhashay mucaarad hubaysan sanadihii dhammaadkii 1970-yadii iyo sideedamaadkii. Jabhadahaas ayaana ugu danbayn ridey xukuumaddii; taasina waxaa xigay dagaal sokeeye oo lagu hoobtay. Dagaal oo geyaalkiina waxa ay ku fashilmeen in ay yagleelaan xukuumad loo dhan yahay. Jabhaddii Somali National Movement (SNM) oo gacanta ku dhigtay inta badan woqooyiga dalka ayaan ku dhawaaqday May 1991 in ay Soomaaliya ka go'een, goonina isku-taageen. Jabhadihi koofurtana waxa ay sii wadeen dagaalkii dhex-dooda ahaa.

Jamhuuriyadda Saddexaad

Markii ay dhalatay Jamhuuriyadda Saddexaad intii lagu guda jiray Shirki Dib-u-heshiisiinta Carta ee Jabuuti 2000, ergadii Soomaaliyeed ayaan isku raacay in ay wadaagaan 225 xildhibaan oo ka mid noqonaya Baarlamaankii Ku-meel-gaarka ahaa iyada oo loo marayo hab-raac beeled, kaas oo siinaya saamiyo isku mid ah afarta qabiil ee waaweyn (Daarood, Dir, Hawiye iyo Digil & Mirifle) iyo nus (bar) isutagga qabaa'ilka yaryar. Shirka ayaan sidoo kale ku maamuusay 20 xubnood Madaxweynaha martida loo ahaa Madaxweyne, Ismaaciil Cumar Geelle, si loogu qaybiyo

shakhsiyaadka ixtiraamka ku dhaxleh bulshada ee ka soo qeyb galay shirka.

Hirgelinta nidaamka 4.5 ee siyaasadda Soomaaliya ayaa ahaa xal ismariwaa taagnaa looga gudbey, laakiin noqday nidaam la eeday oo labaatankii sano ee la soo dhaafay siyaasadda Soomaaliya dabray. Marka laga eego dhinacyo badan, nidaamka 4.5 waxa uu noqday ictiraaf iyo garowsi in dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya uu ku dhammaaday isku bar-bar-dhac. Markii lagu kala adkaan waayey dagaalkii sokeeye lana waayey qolo xoog ku maquunisa inta kale, ayaa waxaa lagu khasbanaaday in la sameeyo habqaybsiga awoodda ee 4.5, maaddaama uu qabaa'ilkii waaweynaa siiyay awood siman. Si kastaba ha ahaatee, inta badan Soomaalida waxa ay dhaleeceeyaan ama suluug weyn ka muujiyeen nidaamkaas beelaysiga ku dhisan, ahna wax dunidu waa hore ka tagtay. Nadaamkan 4.5 ee awood qeybsiga beelaha ayaan noqday mid curyamiyey mudnaanta iyo kartida qofka Soomaaliyeed iyo weliba isla xisaabtanka.

Arimahaas kore awgeed, ayaan dad badan u arkaan nidaamka beel wax ku qaybsiga ee 4.5 mid aan caddaalad ahayn, halka ay qaar kale u arkaan, xal ku meel gaar ah.³⁴ Sidaas oo ay tahay Soomaalidu waxa ay la daalaadhadacysaa sidii ay iyaga iyo 4.5 mar uun u kala hari lahaayeen, waayo, la'aanta 4.5 iyo la'aanta baddiil kale, waxa ay keenaysaa in awoodda siyaasadeed ee Soomaaliya ay gacanta u gasho beelo gaar ah, ayna dhici karto kuwo kale oo hadda awood siyaasadeed wax ka haysta in ay fara-marnaan ku dhacdo.

³⁴ Afyare A. Elmi, Decentralized Unitary System: A Possible Middle-Ground Model for Somalia, Doha Institute, 2015. Available at: <https://www.dohainstitute.org/en/ResearchAndStudies/Pages/Decentralized%20Unitary%20System%20A%20Possible%20Middle%20Ground%20Model%20for%20Somalia.aspx>. Arag: Mohamed H. Mukhtar, "Somali Reconciliation Conferences: The

Unbeaten Track," in Abdullahi A. Osman and Issaka S. Souare [eds.] *Somalia at the Crossroads: Challenges and Perspectives in Reconstituting a Failed State* (London: Adonis and Abbey Publishers, 2007); Mohamed A Eno, and Omar A Eno. "Intellectualism amid Ethnocentrism: Mukthar and the 4.5 Factor." *Bildhaan: An International Journal of Somali Studies* 9, no. 1 (2011).

Marka laga eego dhanka qaabaynta hannaan doorasho, shirkii nabadaynta ee Carta, kaas oo lagu amaamuday dowladdii ku meel gaar ahayd ee ugu horreysey (toban sano oo dagaal sokeeye iyo dolwlad la'aan ah kaddib), ergooyinkii Soomaaliyed ee shirkaasi waxa ay qaateen nidaamka matalaad siyaasadeed oo ku salaysan beelalaha, iyada oo aan loo eegin tiradda ama dhulka uu qabiikaasi degan yahay. Hoggaamiyeyaaasha dhaqanka ayaa si toos ah u soo magacaabay xubnaha baarlamaanka, iyaga oo la tashanaya odayaasha dhaqanka jufooyinka hoose ee beelaha. Sannadadii 2000 iyo 2004, wakiilladii labada shir ee nabadda waxa ay ku heshiiyeen in 12% haweenka loo qoondeeyo. Sanadkii 2000, Baarlamaakii ku-meel-gaarka ahaa wuxuu u soo doortay Cabdiqaasim Salaad Xasan in uu noqdo Madaxweyne.

Shirarkii dib-u-heshiisiinta ee lagu qabtay Kenya (2004) iyo Jabuuti (2009) ayaa sii wadey nidaamkii 4.5 laakiin waxa ay beddeleen tirada kuraasta. Waxaa la siiyey awoodda 23 hoggaamiye kooxeed shirkii dib-u-heshiisiinta Soomaalida ee Kenya, iyaga ayaana kordhiyey oo gaarsiiyey kuraastii hay'adda sharci-dajinta 275 xubnood iyada oo aanan laga leexan hab-raacii 4.5 ee qabaailka - 61-kursi ayaa waxaa helay mid kasta oo ka mid beelaha lagu sheego qabaa'ilka waaweyn iyo 31 xildhibaan oo ay heleen qabaa'ilka isutagay ee loogu yeero kuwa laga tira badan yahay. Qoondada dumarku ayanan waxba iska bedelin oo 12 boqolkiiba ayaa lagu dhaafay.³⁵ Cabdullahi Yusuf Axmed ayaana loo doortay madaxweyne.

³⁵ Arag Qodobka 29 eeAxdiga Ku-meel-gaarka ah ee Federaalka. oo aad ka helaysid:
<http://www.ilo.org/dyn/travail/docs/2177/Transitional%20Federal%20charter-feb%202004-English.pdf>

³⁶ Arag Afyare Abdi Elmi, Revisiting the UN-Controlled Constitution-Making Process for

Si kastaba ha ahaatee, carqaladihi siyaasadeed ayaa sii socday, sannadkii 2009kii Jabuuti ayaa waxa ay marti gelisay shir kale oo dib-u-heshiisiineed oo u dhexeeyey Dawladdii Federaalka Ku-meel-gaarka aheyd iyo islaamiyiinta loo yaqaanney Isbahaysiga Dib-u-xoreynta Soomaaliya (ARS) ee ka soo horjeeday dagaaloogayaashii Muqdisho. Isbahaysigaas Islaamiyiintu ay hogaaminayeen ee hubeysnaa ayaa isku raacay in ay ku soo biiraan dawladda. Taa badalkeeda, ARS waxaa loo oggolaaday in ay ku soo darsato baarlamaanka tiro la'eg intii uu ka koobnaa oo xildhibaano ah waxa ayna ka dhigtay tirda xildhibaannada baarlamaanka 550 xubnood ayada oo weli lagu dhaqmayo nidaamka 4.5; ARS waxa ay xildhibaannada ka soo xuleen taageerayaashooda, iyaga oo ku dhaqmaya 4.5. Baarlamaankii la ballaariyay ayaa madaxweyne u doortay hogaamiyihii ARS-ta Shariif Sheekh Axmed.

Xafiiska Qarammada Midoobay u qaabilsan arrimaha siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) ayaa gacan ka siiyey xukuumadda Soomaaliya in ay diyaariso dastuur cusub si looga gudbo muddada kala guurka ah.³⁶ Sannadkii 2012, saamilayddii siyaasadda Soomaalida ayaa waxaa ay ku heshiiyeen dastuur qabyo ah oo hoos ugu soo dhigay tirada xildhibaannada 275. Dastuurka ku-meel-gaarka ah ayaa sidoo kale abuuray aqal kale oo matalaya dawlad goboleedyada markaas badankooda la aasaasayey ee xubnaha ka ah federaalka.³⁷ Hadana sidii oo kale, odayaashii beelaha ayaa si toos ah u magacaabay xildhibaannada.

Somalia, September 2, 2012. Available at:
<https://www.e-ir.info/2012/09/02/revisiting-the-un-controlled-constitution-making-process-for-somalia/>

³⁷ Arag Qodobka 55 ee Dastuurka Qabyada ah, oo aad ka helaysid:

Tirada qoonadada haweenka ayaa la gaarsiiyey ilaa 30 boqolkiiba, in kasta oo 14 boqolkiiba oo kaliya haween ahaayeen xubnaha baarlamaanka la magacaabey. Baarlamaankii ka koobnaa 275-ka Xildhibaan ayaa u doortay Xasan Sheekh Maxamuud inuu noqdo madaxweynahii siddeedaad ee Soomaaliya bishii Sebteembar 2012. Wuxuu ay ahayd arrin aad u weyn, in doorashadii ugu horreysey ay Muqdisho ka dhacdo laga soo bilaabo 1967-dii. Maamulkii Madaxweyne Xasan Sheekh ayaa noqday markii ugu horreysay dawlad aan ku-meelgaard ahayn tan iyo dagaalkii sokeeye 1991-kii.

Inkasta oo mid ka mid ah masuuliyaadkii aasaasiga ahaa ee dawladdii Madaxweyne Xasan Sheekh ay ahayd in ay dalka u diyaariso doorashooyinka guud sanadka 2016-ka, taasi ma dhicin sababta oo ah isu xilqaamid la'aanta arimahan labadii sano ee ugu horeysay iyo xaaladaha amniga oo aaanan saamixin. Intaa waxaa dheeraa, dowladdu waxa ay diiday in ay ku noqoto nidaamkii hore oo odayaal dhaqameedku soo xulayeen xildhibaannada. Kaddib wada xaaajoodyo xooggan oo lala yeeshay saamileeydii kale (gaar ahaan dawlalahii xubinta ka ahaa federaalka iyo gudoonkii baarlamaanka federaalka), ayaa dowladdu waxaa ay la timid "qaab-dhismeed kor uqaadaya sharciyada / enhanced legitimacy".³⁸ Iyada oo lagu saleynayo qaabkan, ayaa sannadka 2016, hoggaamiyeyaa dhaqameedku waxa ay magacaabeen 51 xubnood oo ka kala imanaya jufooyinka

hoose ee qabaa'ilka kursta ku lahaa baarlamaanka. Sidaa darted, 51-da xubnood ee la xulay ayaa markaa soo doortey xildhibaannada. Dhammaan, ku dhowaad 15,000 oo qof ayaa u codeeyay 275-kii xildhibaan, laakiin doorashooyinkii waxaa hareeyey musuq-maasuq aad u baahsanaa iyo maamul-xumo. Wuuna ka fogaa mid xor iyo xalaal ah.

Golahii Hoggaanka Qaranka (GHQ), oo uu hoggaaminayo Madaxweynaha Xasan Sheekh oo ay ka mid ahaayeen madaxweynayaasha dawladdaha xubnaha ka ah dawladda federaalka, ayaa isku raacay in ay sameeyaan aqal labaad oo ka kooban 54 xubnood oo matalaya dowladaha xubinta ka ah dawlada federaalka, sida ku xusanayd dastuurka qabya-qoraalka ah ee laqoray 2016-kii.³⁹ GHQ ayaa gobol kasta u qoondeeyey tiro kuraas ah sidii ay iyaga la noqotay: Jubbaland, Koonfur Galbeed, Hirshabelle iyo Galmudug waxaa ay heleen midkiiba (siddeed) kursi, halka Puntland iyo Somaliland ay ka heleen midkiiba (11). Madaxda dawlad goboleedyada ayaa laba ilaa saddex musharax (oo ka mid ah musharrixiintii ku tartamaysay kuraasta taalay dowlad goboleedyadooda) u soo xulay kursi kasta oo aqalka sare ah oo loo tartamayey. Baarlamanadda dowlad goboleedyadda ayaa markaa kadib u codeeyay mid ka mid ah musharaxiinta isu soo hartay.⁴⁰ Febraayo 8, 2017, labada aqal ee baarlamaanka ayaa u doorteen, Maxamed Cabdullaahi Farmaajo in uu noqdo madaxweynahii sagaalaad ee Soomaaliya.

https://gsh.parliament.gov.so/images/Downloads/Dastuurka_ku_meelgaarka_SOM_03092012-1_2.pdf

³⁸ Arag war-murtiyeedka Golaha Hoggaanka Qaran. aad ka helaysid:
http://doorashada2016.so/wp-content/uploads/2016/09/NLF-7-August_Somali.pdf

³⁹ Arag qodobka 55-aad ee dastuurkaqabyada ah.

⁴⁰ Arag war-murtiyeedkii Golaha Hoggaanka Qaran.

Jaantuska 3-aad: Habab loo isticmaalay xulidda baarlamaanka qaran ilaa 2000

Baarlamaanka	Xilliga	Tirada	Yaa xushay	Qaabka
Baarlamaanka qaran eek u meelgaarka	Ogosto 2000	225	Oday dhaqameedyada	4.5 (20 kursi waxaa la siiyey dadkii caanka ahay ee shirka ka soo qayb-galay iyagda oo aan beel loo eegin
Baarlamaanka Federaalka ee ku-meel-gaarka	Oktoober 2004	275	Hoggaamiye kooxeedyada & oday dhaqameedyada	4.5 (61 kursi ayay heleen 4-ta beelood ee waaweyn; 31 kursi-na waxaa qaybsaday beelaha yar-yar)
Baarlamaanka Federaalka ee ku-meel-gaarka	Janaayo 2009	550	Hoggaamiye kooxeedyada, Isbahaysigii dib u xorraynta iyo bulshada rayadka	4.5 (122 kursi ayay heleen 4-ta beelood ee waaweyn; 62 kursi-na waxaa qaybsaday beelaha yar-yar)
Baarlamaanka Federaalka	Ocktoober 2012	275	Oday-dhaqameedka	4.5 (61 kursi ayay heleen 4-ta beelood ee waaweyn; 31 kursi-na waxaa qaybsaday beelaha yar-yar)
Baarlamaanka Federalka	Janaayo 2016	275	Oday dhaqameedyada ayaa magacaabay 51 codeeyayaal oo doortay xildhibaan kasta	4.5 (61 kursi ayay heleen 4-ta beelood ee waaweyn; 31 kursi-na waxaa qaybsaday beelaha yar-yar)
Aqalka Sare	Janaayo 2016	54	Madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada ayaa ayaa xulay laba ilaa saddex musharax , baarlamaanka maalmul goboleedyada ayaana mid ka mid ah u codeeyey Xubnihii Aqalka Sareee Somaliland waxaa lagu toortay hab- gaar ah ⁴¹	Combination of region and clan considerations. Selection was largely arbitrary

⁴¹ Xubnaha Aqalka Sare ku matalaya Somaliland waxaa doortay 23 oday dhaqameed oo doorashada wax ka maamulay ama baarlamaanka wax ka xulay 2012-kii iyo 23 xubnood oo ka socda bulshada

Doorashooyinkii soo maray Somaliland

Somaliland markii ay dagaalka sokeeye ka soo baxday waxa ay guda gashay nidaam doorasho oo ay ku magacaabayso mudanayaal baarlamaan, kuwaas oo doortay madaxweynayaal. Markii ay Jumhuuriyadda ka go'day, jabhaddii Somali National Movement (SNM) ayaa gacanta ku haysey inta badan deegaanada Somaliland. 1991 shirkii Burco ayaa Cabdiraxmaan Axmed Cali (Tuur) loogu doortay madaxweynaha Somaliland. Sanadkii 1993 shirkii dib u heshiisiinta ee Boorame ayaa Tuur waxaa baddeley Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, oo 1960-maadkii Soomaaliya Ra'iisul Wasaare uga ahay. Cigaal waxa uu ahay siyaasi la xurmeeyo, oo khibrad dheer leh, waxa uuna hirgeliyey dastuur cusub oo baarlamaan laba aqal ah siiyey Somaliland iyo hannaanka xisbiyada badan siyaasadda looga qayb-galo, in kasta oo xisbiyada lagu soo koobay 3 xisbi oo keliya.⁴²

Aqalka hoose ee baarlamaanka waxa uu ka koobnaa 82 xubnood, oo matalaya dadweynaha, halka Aqalka sare (Guurti) uu isnaa ka koobnaa 82 mudane oo matala

beelaha.⁴³ Somaliland shan goor ayay madaxweyne dooratay iyaga oo laba goorna isticmaaliya hannaan xulid ah, saddex jeer oo kalana doorasho dadweyne ku doortay madaxweynaha. Waxaa xulid lagu doortay Cabdulrahman Axmed Cali Tuur iyo Maxamed Xaaji Ibraahim Cigal. Shacabkuna waxa ay doorteen Daahir Rayaale Kaahin (2003), Axmed Maxamed Maxamuud Siilanyo (2010) iyo Muuse Biixi Cabdi (2017).

Laakiin, taariikhda xildhibaanno doorashada Soomaaliland uma dhisna sida ay u horumarsan tahay doorashooyinka madaxweynaha. Xal u helidda habka iyo hannaanka la isku matalayo ayaa ahayd mid aan fududayn, xaasaasina ah, taas ayaana keentay in Somaliland uu ka hirgalo oo kaliya hal doorasho baarlamaan taas oo dhacday 2005, markaas oo baarlamaanku xeerihey lix gobol in ay Somaliland ka koobnaato, halkaas oo gobol kastana kuraas loo qoondeeyey. Saamileeydii siyaasadeed ee Somaliland oo ay ka mid ahaayeen xisbiyadii siyaasadda iyo mudanayaasha golayaasha baarlamaanka ayaa ku heshiiyey hanaan ku salaysnaa degmooyinkii hore ee Somaliland iyaga oo dhanka kale xubnaha baarlamaanka gaarsiiyey 82.⁴⁴

Tusmo 4: Qaabka kuraasta loogu qaybiyey gobolada Somaliland

Waqooyi Galbeed	Awdal	Sahil	Togdheer	Sanaag	Sool
20	13	10	15	12	12

rayadka oo ah dad magac leh oo ka soo jeeda Somaliland. Guddi 5 qof ahaa oo fulineed ayaa 46 doorte u soo gudbinayey magacyada musharixiinta.

⁴² Bradbury, 2008.

⁴³ Verjee, A. (2015). The Economics of Elections in Somaliland: The financing of political parties and candidates.

⁴⁴ Bradbury, 2008.

Qaababka doorasho ee ay Soomaaliya 2020-ka qaadan karto

Caddeymaha aan kor ku soo xusnay waxa ay tibaaxayaan in Soomaaliddu ay leedahay taariikh iyo khibrad ku filan markii ay noqoto xulashda ama doorashadda siyaasiyiinta. Wuxuu ay sidoo kale tusmeyneysaa in uu jiro horu-u-socod ku aadan dhanka doorasha qof iyo cod. Hase-ahaatee, ka hor 18-ka bilood ee ka harsan xilliga Madaxweyne Farmaajo, waxaaa jira su'aalo laga keenay dadaal la'aanta ka jirta in la qaado talaabooyin cad cad oo keeni kara in ay dhacdo doorasho dalkoo idil ah.

Run ahaantii, waxaa labbo sano ka hor soo ifbaxday in doorasha qof-iyo-cod ah aysan suurtagal ka ayan dalka, kaddib markii guddmooyihii hore ee Baarlamanka Maxamed Cismaan Jawaari uu warqad u diray Agaasimaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Soomaaliyeed, Xaliimo Ismaaciil, taas oo looga dalbaday in ay soo gudbiyeen arrimaha loo baahan yahay in la helo si dalka looga qabto doorasho qof iyo cod ah. Guddiga oo ka jawaabaya sagaalkii su'aalood ee Gudoomiyaha baarlamaanka, ayaar arrimaha loo baahan yahay in wax laga qabto si ay doorasho u dhacdo ku tilmaamay: in amaanka wax laga qabto, in ay heshiis siyaasadeed gaaraan saamileydda siyaasadda, dib u eegis in lagu sameeyo dastuur iyo in baarlaamanka Soomaaliya uu ansixyo 7 sharci oo ay ka mid yihiin; Sharci doorashadda, sharci axsaabta, sharci la dagaalanka musmuqmaasuqa iyo sharci jinsiyadda.

Waxaa intaas dheer in Guddiga Madaxbanaan ee doorashooyinka uu sheegay inuu u baahan yahay lacag ka badan 130 milyan oo dollar, ama afartan boqolkiiba miisaaniyadda dalka, iyo 500 oo shaqaalo, taas oo u dhiganta 10% shaqaalahay rayidka, si loo qabto doorasho qof iyo cod ah. Amaanka guud ee dalka ayaa sii cakirmay labbadii sano ee la soo dhaafay, toos oo sii adkeysay in doorasho dalka ka hirgasho. Sidoo kale, guddiga doorashooyinku waxa uu ku qiyaasay lacagta loo baahan yahay si doorasho ay u dhacdo 130 milyan, oo la mid ah 40% miisaaniyadda dowladda iyo ku dhawaad 500 shaqaale ka shaqeeyaa doorashada si loo hirgeliyo doorasho xor iyo xalaal ah. Dhanka kale amniga dalku waa uu ka sii daray labadii sano oo la soo dhaafay, taas oo keenaysa in la sawirto in ay dhici karto doorasho amni ah. Dowladdu awood uma lahan in ay iska bixiso dhaqaalahay loo baahan yahay si doorasho loo qabto. Waxaa intaa dheer, in aysan jirin Maxkamad Dastuuri ah oo kala saari karta haddii la isku khilaafka natijadda doorashadda, sharci ahaanta xeerka iyo guud ahaan arrimaha la xariira khilaafka shuruucda ee dhex mari kara hay'adaha dowladda.⁴⁵

Sidoo kale, waxaa arrin taagan noqotay khilaafka siyaasadeed ee ka dhaxeeyaa dowladda iyo maamul goboleedyadda iyo saamileydda kale ee siyaasaada. Seddex maamul goboleed, Puntland, Jubbaland, Galmudug iyo axsaabta dalka oo labo ka mid ah ay horumuud ka yihiin labo madaxweyne oo hore ayaa si bareer cad u dhaliilay

⁴⁵ Arag Dastuurka qabyada, Qodobka, 109B:
<https://www.parliament.gov.so/images/Dow>

nloads/Dastuurka_ku_meelgaarka_SOM_030
92012-1_2.pdf

hanaanka ay dowladdu u wajahayso doorashooyinka 2020-ka.⁴⁶

Machadka Heritage isaga oo arrimahaas kore oo dhan maanka ku haya, waxa uu soo bandhigayaa hannaan doorashooyin dhowr ah oo Soomaaliya kala dooran karto. Waloow noocyoo doorasho oo kale ay jiri karaan, haddana afarta qaab-doorasho oo aan halkaan ku soo gudbinayno waa kuwo wax ku biirin kara doodda ka socota 2020-ka Soomaaliya sidii doorasho dadka iyo dalka u cuntanta ay uga dhici lahayd, gaar ahaan doorasho la hirgelin karo, lawada aqbli karo, la awoodo, caddaaladna ku salaysan.

Machadka Heritage waxa kale oo uu dejiyey 7 halbeeg ama shuruud oo hab-doorashadii ay qaadanayso Soomaaliya loo baahan yahay in ay buuxiso. Hababka doorasho ee afarta ah, sida ay u kala buuxiyaan shuruudaha ayayna ugu kala dhaw yihiin in doorashadu ay tahay mid hufan:

1. Nooc doorasho kasta oo la qaato waa in uu noqdaa mid aan xaalka Soomaaliya uga darin. Sidoo kale, waa in hannaankaas doorasho aanu horseedin qalalaaso ka dhax aloosma bulshada Soomaaliyeed, aysan dib u celin horumarradii soo socday ilaa sanadkii 2000.
2. Nooc doorasho kasta oo la qaato 2020, waa in ay jidka u xaarto doorasho qof-iyo-cod ah oo dhaeda doorashadan midda xigta. Doorashooyinkii la soo dhaafay waxa ay dalka u siqinayeen dhanka doorasho xor iyo xalaal ah,

doorashada 2020-kana sidaas ayaa looga fadhiyaa.

3. Nooc doorasho kasta oo la qaato, waa in uu ilaaliyaa doorka dumarka iyo beelaha laga tirada badan yahay. Hoggaanka siyaasadeed waa in ay ku faanaan in dumarka Soomaaliyeed ay yihiin baarlamaanka ku leeyihiin qoondo 30% ah, taas oo aan kaga horeyno dowladdo badan oo dhanka dimuquraadiyadda horumar ka ah. Sidoo kale, beelaha laga badan yahay waa in ay helaan mataalaad macno leh.
4. Nooc doorasho kasta oo la qaato, waa in uu noqdo mid ku salaysan axsaabta siyaasadda. In xisbiyo loo gudbo, waa jidka ugu wanaagan ee lagu gaari karo dimuquraaddiyad buuxda. Sidoo kale ku shaqaynta xisbiyadu waxa uu dhidibadda u aasayaa in uu abuurmo nidaam furfur, xor ah, aanna ku salaysnayn hayb ee ku salaysan aragti.
5. Nooc doorasho kasta oo la qaato, dadka ka qeyb qaadanaya doorashadaas waa in ay noqdaan dadka ugu badan ee codayn kara, si loo yareeyo musuqmaasuq, loogana dhigo maxsuulka tartanka ka soo baxa, mid loo dhan yahay ama haysta taageero badan oo muwaadiniinta ah;
6. Nooc doorasho kasta oo laga qaato afarta hannaan ee aan soo jeedinney waa in la hirgelin karo waqtiga kooban ee la haysto;

⁴⁶ Halkan ka eeg war-murtiyeedka t:
<https://goobjoog.com/aragtida-xisbiyada-ee-ku-aaddan-doorashooyinka-dalka-akhriso>

- Nooc doorasho kasta oo la qaato, waa in ay isku waafaqaan saamileeyda siyaasadeed (gaar-ahaan, dowladda dhexe, maamul goboleedyada iyo axsaabta siyaasadda). Wadar-oggolka bahda siyaasadda iyo saamileydaayaana ka dhigtay doorashooyinkii 2012 iyo 2016 kuwo hir gala.

Ayada oo laga duulayo halbeegyada kore iyo 7-da shardi ee aan kutilmaannay in ay aasaasi u yihiin doorasho hufan oo dhacda 2020, Machadka Heritage waxa uu soo bandhigayaa afar nooc-doorasho oo loo mari karo doorashadda 2020.

- Soojeedinta Baydhabo (Proportional Representation, Closed List system)
- Soojeedinta Kismaayo (Proportional Representation, region-based closed list system)
- Soojeedin turxaan bixisay hannaankii 2016 (Modified Enhance Legitimacy model)
- Soo jeedin dhanna beelahu hormuud yihiin xisbiyana ay jiraan (Clan Constituency Proposal)

Soo Jeedin Baydhabo (closed list, proportional representation)

Nooc-doorashada aan u bixinay **Soojeedinta Baydhabo** waa hannaan doorashadeedkii ay Juun 2018 Baydhabo iskula waafaqeen dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada.⁴⁷ Waana hannaan ku salaysan matalaadda isku dheelli-tiran ee

liiska xiran ee xisbiyada. Hannaankani waxa uu ku salaysan yahay doorasho xisbiyo lagu tartamayo, lagana tartamayo magaaloooyinka iyo meelaha ay dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyadu ka taliyaan, dooroshana ay ka dhici karto, xitaa haddii 10% dad aan ka badnayn ay codeeyaan. Doorashada aqalka sare waxa ay u dhacaysaa hannaan la mid ah sida ay u dhacayso doorashada baarlamaanka ama aqalka hoose. Muwaadiniinta ugu badan oo la heli karo ayaa u codaynaysa mudanayaalka aqalka sare. Sida uu dhigayo Qodobka 72-aad ee dastuurka ku-meel-gaarka oo tilmaamaya qaabka loo dooranayo mudanayaalka aqalka sare, xisbiyo wata liis xiran oo heer gobol ah ayaa ka tartamaya maamul-goboleedyada, mid kasta inta kursi mudane aqalka sare oo yaalla.

Ugu danbayn, sida uu tilmaamayo nooc doorashada **Soojeedinta Baydhabo**, xisbigii ku guul-darraysta in uu helo 7% codadka guud ee ansaxa noqday, Guddiga Doorashooyinka ayaa u sheegaya in uu xisbigiaasi lumiyey aqoonsigii.

⁴⁷ Dowladda federaalka iyo madaxda gobolada ayaa mar danbe isku khilaafay qodobada heshiiskii Juun 2018.

Soo jeedinta Baydhabo	
Hanaanka Doorashadda	Matalaadda isku dheelli-tiran, liis xiran (ee Xisbiyada)
Hannaanka 4.5 ee awood iyo xil-qaybsiga	275 ee baarlamaanka waxaa ku ilaalinaya nidaam beeledka 4.5, gaarahaan saamiga beel-weynta (Tusaale ahaan in Daarood, Dir, Hawiye, Digil & Mirifle in ay midkiiba helo 61 kursi balse, wixii intaa ka hooseeya aan damaanad la haysan in beel kasta ay heli doonto waxay hadda haysato;
Dumarka	Waxuu ilaalinaya qoondadda dumarka ee 30%-kiiba ah
Deegaan-doorashada Degmo	Dalka oo idil,waxaa loo ictiraafayaa hal deegaan-doorasho
Dhinacyada uu ku fiican yahay	<ul style="list-style-type: none"> • Waxuu u dhaw yahay doorasho qof iyo cod ah; • Waxuu ilaalinaya qoondadda dumarka iyo beelaha; • Waxuu ku salaysan yahay xisbiyo; • Waa badan yihiin dadka codaynaya; • Waxuu yareynaya musuqmaasuqa; • Qayb ahaan waxa uu xallinaya doodda Gobolka Banaadir, Soomaaliland, iyo barakacayaasha
Meelaha uu ku liito	<ul style="list-style-type: none"> • Waxaa ka muuqda deg-deg, lamana hubo in lagu gaarayo doorasho qof & cod ah; • Hirgelintiisu suurtagal uma eka hadda maaaddaama aanay oggolayn maamullo iyo xisbiyo hannaan kasta oo doorashana uu u baahan yahay waddar-oggol saamileeyda siyaasadda; • Waxaa suurtagal ah in uu hareer maro nidaamka awood-qeybsiga 4.5, kana boodo mabada' ah "ha uga darin".

Hannaankan doorasho ee **Soojeedinta Baydhabo** waxa uu u shaqaynaya sidan: xisbi kasta oo diiwaan gashan waxa uu diyaarsanaya 275 musharax xildhibaan oo ku saleysan hanaanka awood qeybsiga ee 4.5, qoondadda dumarkana la ilaaliyo. **Soojeedinta Baydhabo** ee matalaadda isku dheelli-tiran ee liiska xisbiyada xiran, waxa ay aragtaa in qof kasta oo muwaadin oo doonaya in uu codeeyo uu codkiisaka ka dhiiban karo magaaloo yinka iyo goobaha ay dowladda iyo maamul-goboleedyadu ka taliyaan. Wuxaan loo codaynaya xisbiyo

ku tartamaya liis 275 mushrax ah; dalka oo dhan waxaa loo aqoonsanaya hal deegaan-doorasho. Kursi walba waxaa helaya qabiilka guud ee horay u lahaa. Xisbi walba waxaa kuraasta loogu qeybin doonaa wadarta guud ee uu ka helo dadka codeeyey. Walow ay fududahay in kuraasta lagu qaybiyo tirada xisbi kasta uu ka helay codka guud, haddana way adkaan doontaa in liiska xisbiyada iyo codkaba la waafajiyoo qaabka wax qaybsiga ee 4.5. Xaqiqadii, Soojeedinta Baydhabo, ma fududa in la hirgeliyo.⁴⁸.

⁴⁸ Tusaale ahaan, wey adkaan doontaa in beel kasta (tusaale ahaan Murusade, Ogaadeen

ama Xawaadle) ay dib u helaan kuraasta xildhibaannadda ay hadda ku leeyihiiin

Isku soo duub oo, haddii hanaanka doorashaddu uu noqdo nooca axsaabta badan, liis-kuna uu xiran yahay, way adkaan doontaa in nidaamka awood qeybsiga ee 4.5 uu sidiisa ku soo laabto. Waxaa sidoo kale adkaan doonta in awood-qeybsiga Aqalka Sarre uu isaguna sidiisa ku soo noqdo. Sida ku cad qoddobka 72-aad ee dastuurka, axsaabta waxa ay ku tartami doonaan liis xiran oo ah heer maamul goboleed iyo heer dowladda dhexe. Ugu dambayn, xisbigii aan helin codad ka badan 7%, kuraas ma qaadan doono doorashadda sida ku cad Soojeedinta Baydhabo ee matalaadda isku dheelli-tiran ee liiska xisbiyada ee xiran.

Soo Jeedinta Kismaayo (Soo jeedintii maamul-goboleedyada)

Shaxda 5: Kuraasta Aqalka Hoose⁴⁹

Jubbaland	Southwest	Banadir	Hirshabelle	Galmudug	Puntland	Somaliland	Total
39	69	7	37	36	40	47	275

Kuraasta Aqalka Sarre

Jubbaland	Southwest	Banadir	Hirshabelle	Galmudug	Puntland	Somaliland	Total
8	8	0	8	8	11	11	54

Soojeedinta Kismaayo ama matalaadda isku dheelli-tiran ee liiska xiran ee xisbiyada ee ay maamul-goboleedyadu yihii deegaan doorashooyin, ayna soo bandhigeen maamul-

baarlamanka hadii hanaanka wax lagu qeybsanaayo uu noqdo kan axsaabta baddan; beelaha kalana waa la mid. Ugu yaraan, waxaa laga yabaa in 61-da xildhibaan ee ka soo jeedda beelaha Darood, Digil iyo Mirifle. Iwm, in ay dib u xajistaan kuraastodda, lakiin

Sideedi bishii September 2018, maamul goboleedyadda Soomaaliya ayaa soo saaray war-murtiyeed ku aaddan hannaanka doorashada. In kasta oo ay xuseen in ay ayidsan yihii nidaamka doorasho ee dowladdu keentay ee matalaadda isku deelli-tiran ee liiska xiran ee xisbiyada, haddana waxa ay tilmaameen in ay doonayaan in deegaan doorashadu uu noqdo heer maamul-goboleed. Soojeedinta Kismaayo ee madaxda goboladu wax ay qabtaa in maamuladu ay soo doortaan labadda aqal ee baarlamanka. Shaxda hoose ayaa muujinaysaa tiradda kuraasta xildhibaan ee gobol walba taalley doorashadii hore ee 2016, taas ayayna hannaan doorsheedka ay maamul gobaleedyadu ayideen ku talinaysaa in doorashada 2020 lagu celiyo.

goboleedyadu, waa mid buuxinaya hal-beegyada ama shuruudaha ah: in la helo tiro badan oo codeeyayaal ah, in la dhowro awood-qaybsiga beelaha ee 4.5, in haweenku

kuraasta jufooyinka hoose ay wareegto, ama is badasho.

⁴⁹ Eeg Shaxda sida ay gobolladu u kala helayaan kuraasta (chart of how seats were assigned to the regions). Ka dheego at: http://doorashada2016.so/wp-content/uploads/2016/09/shaxda-qaybinta-xildhibaannada_SOMALI.pdf

ay helaan qoondadoodii, waa hab-doorasheed u socda dhinaca hal-qof iyo hal-cod, waana hannaan keenaya in xisbiyo siyaasadeed lagu hawl galo; hannaan-doorasheedkaani waxa uu ku liitaa, waa mid ay soo bandhigeen madax maamul-goleedyo badankood la baddeley una baahan – haddii la qaadanayo – waddaroggol cusub ee saamileyda siyaasadda ah. Waxaa kale ee nooc-doorasheedkan aannu ku magacownay *Soojeedinta Kismaayo* aanu xal u hayn saddex arrin oo kale oo taagan, sida: in dadka caasimaddu ay matalaad helaan, arrinta Soomaliland iyo sidii ay cod bixin u

helii lahaayeen dadka barakacayaasha.⁵⁰ Waxaa intaa ka sii muhiimsan, inkasta oo Soojeeditaan maamul-goboleedyadu ay keeneen ay tilmaamayso in deegaan-doorashada lagu jaangooyo maamul goboleedyada (oo ah deegaanno baaxadweyn), haddana taasi waxa ay wiiqaysaa sidii dadka la doorto ay u noqon lahaayeen kuwo ay la xisaabtami karaan kuwa doortay, waayo Koofur-galbeed oo dhan ama Hirshabelle oo dhan ayaa xildhibaan dooranaya, ee Balcad xildhibaan iyada matala dooran mayso.

Soojeedinta Kismaayo ee Maamul-goboleedyada	
Nidaamka doorashada	Matalaadda isku dheelli-tiran, liiska xiran ee xisbiyada
4.5	275 ee baarlamaanka waxaa ku ilaalinayaan nidaam beeledka 4.5, gaarahaan saamiga beel-weynata
Jinsiga	Wuu ilaalinayaan qoondadda dumarka ee 30% -kiiba ah
Deegaan-doorasho	Wuxuu deegaan-doorasho u arkaa: Puntland, Jubbaland, Koofur-galbeed, Galmudug, Hirshabelle, Somaliland & Banaadir
Dhinacyada uu ku fican yahay	<ul style="list-style-type: none"> • Waxuu u dhaw yahay doorasho qof iyo cod ah; • Waxuu ilaalinayaan qoondadda dumarka iyo dadka la; • Waxuu ku salaysan yahay xisbiyo; • Waa badan yihii dadka codaynaya; • Waxuu yareynayaan musuqmaasuqa;
Dhinacyada uu ku liito	<p>Kama muuqato in lagu gaarayo doorasho qof & cod ah; hirgelintisu suurtagal uma eka hadda, maaaddaama aanay oggolayn maamullo iyo xisbiyo; hannaan kasta oo doorashana uu u baahan yahay wadar-oggol saamileyda siyaasadda</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Si buuxda uma xalinayo xuquuqda codeyn ee ay leeyihiin muwaadiniinta Mogadishu, barakacayaasha ama dadka ka soo jeeda Somaliland.

⁵⁰ Dhinacyada soo diyaariyey hannanka doorasho ee Soojeednta Baydhabo ee ay ka wada xaajoodeen dowladda federaalka iyo maamul-goboleedyada June 2018, waxay ku doodaan in ay xalliyeen baahida

barakacayaasha reer Somaliland iyo reer Muqdisho in ay codeeyaan, halka dad kale ay ku diidaan in ssi dhab laguna qanci karo loo xaliyey.

Hannaan doorasho oo hagaajinaya Qaab-doorasheedkii 2016 (Modified Enhanced Legitimacy)

Qaar ka mid ah bulshadda rayadka iyo siyaasiyiinta ayaa soo jeediyeey in turxaan-bixin iyo tayayn lagu sameeyo qaab-doorashadii ugu danbeysey ee 2016 ee ay xildhibaanaada dooranayeen 51 ergo. Waxa ay indheer-garadka qaar ku taliyeen in halka doorashadii hore ay 51 ergey codaynayeen, in doorashada 2020, la tobani laabo, oo ay codeeyaan 501 ergo. Waxaa kale oo ay ku taliyeen in kursi kasta oo ka mid ah 275kursi ee hadda jira loo asteeyo ama loo xiro beesha iminka haysata. Iyo in wadarta guud ee ergooyinka heer qaran ($501 \times 275 = 137,775$) ama heer maamul goboleed (Tusaale, Koofur galbeed waxaa yaal, 69 kursi ($501 \times 69 = 34,569$) ay u codeeyaan uu mid kastaa ku tartamayo liis ay ku qoran jijiin 275 musharax oo ay ku dhan tahay qoondada haweenka iyo beel kasta inta kursi oo ay hadda leedahay.

Ugu danbayn, hannaankan turxaan bixinaya qaab-doorasheedkii 2016-ka, waxaa kale oo u soo jeedinayaa in aqalka sare ay doortaan baarlamaanada maamul goboleedyada balse aanay madaxweynayaashu soo gudbin saddex qof oo la kala doorto (sidii ay 2016

sameeyeen) balse kursiga uu u tartami karo qofkii gobolka deggen oo doonaya in uu noqdo senator haddii uu buuxiyo shuruuddaha.

Soojintanta doorasho ee ku salaysan qaab-doorasheedkii 2016 oo la toos-toosiyey, waxaa loo arki karaa mid buuxinaya shuruudo badan. Sidaas oo ay tahay, waa hannaan beelaha iyo haweenkaba saamigooda u oggol; waxaa kale oo uu kor u qaadayaa inta qof ee halka xildhibaan dooranaya (heer gobal waa ku dhawaad 35 kun oo qof, heer qaranna waa ku dhawaad 140 kun). Waxaa kale oo uu hannaankani hirgelinayaa kaalinta xisbiyada. Hanaankan waxuu dhowerayaa awood-qeybsiga beelaha, qoondadda dumarka, waxuuna kordhinayaa tiradda ka qeyb qaadaneysa cod-bixinta, waxuu ku saleysan yahay nidaamka axsaabta-badan, waxuuna u cuntami karaa dhammaan saamileyda siyaasadda.

Lakiin hanaankan qudhiisa ma cilad la'a. Walooow uu ku dhisan yahay nidaamka axsaabta-badan, haddana 501 qofood oo kaliya ayaa codeyn doonta, taas oo mugdi weyn gelin karta in qof iyo codkiis la gaaro. Tan xigta, suurtagal uma noqon doonto dadka barakacayaasha ah in ay ka qeyb qaataan hanaankan. Fursadaha in musuq-maasuq uu dhacana aad ayey u sarreeyaan.

Hannaan doorasho oo hagaajinaya qaabkii doorasho ee 2016	
Nidaamka Doorashada	Matallaadda isku dheelli-tiran ee liiska xisbiyada ee xiran,
4.5	Waxuu ilaalinayaa nidaamka 4.5 ee aqalka hoose
Haweenka	Waxuu ilaalinayaa qoondadda dumarka ee 30%-kiiba ah
Deegaan-doorashada	Waxaa codeeyayaashu ka imaanaan beelaha (kursigiiba 501) ka timaado, lakiin ku jimeysan degmooyinka
Meelaha uu ku wanaagsan yahay	<ul style="list-style-type: none"> • Waa mid loo dhan yahay oo ay ku jiraan dumarka iyo dadka laga tirada badan yahay • Waa hannaan ku saleysan nidaamka axsaabta-badan • Waa qaab doorasho oo u fudud Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka in ay hirgeliyaan • Waa hannaan tayaynaya kuwii hore, caddaaladna ku salaysan oo ay ka muuqato in lagu gaarayo doorasho qof & cod ah
Meelaha uu ku liito	<ul style="list-style-type: none"> • Si aan buurnayn ayuu u kordhinayaa codbixiyaasha • Weli waa badan yihiin fursadaha musuq-masuqa • Waxuu daciifinayaa nidaamka axsaabta

Soojeedinta ah in beeluhu ay noqdan deegaan-doorasho (The Clan Constituency Option)

Qaar ka mid ah khuburada ayaa soo jeediyay in qabiilkasta oo kursi ku leh baaralamanka loo tixgeliyo in uu yahay ‘deegaan-doorasho’ aanay xannibeyn juqraafi ahaan meesha ay markaas joogaan. Hannaan doorsheedkan waxa uu soo jeedinayaa in Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka uu diiwaan geliyo qof kasta oo beel ka tirsan meeshii uu doono dalka ha ka joogee, musharixiintuna qof ahaan ayay u tartamayaan ee liiskii xibiyada doorashadu ma noqonayso. Codeeyayaasha waxa ay beelahooda kala imaanayaan aqoonsi muujinaaya in qofkaasi beeshaas ka tirsan yahay maalinta doorashada qofkasta oo diiwaan gashan waxa uu ka codeynayaa meal kasta uu dalka ka joogo, waxuuna u codeynayaa mushraxa beesha kursiga leh.

Waloow musharax kasta uu ku tirsan yahay xisbi, haddana musharixiintu waxa ay ku tartami doonaan si shakhsii ah (sida Aqalka hoose ee Mareykanka). Habkani culayska kasbashada codeeyayaasha waxa uu saaraysaa musharaxa, halka labada hannaan ee kore uu xisbigu yahay midka ay dadku dooranayaan. Hannaankani waa nooca cod dheerida ama qofka ugu cod-bata ay guushu raacayso, waana uu ka duwan yahay nooc-doorasheedka matalaadda isku-dheelli-tiran ee liiska xiran ee xisbiyada. Waxaa kale oo uu hab doorsheedkan uu tix gelinayaa awood qaybsiga beelaha ee 4.5.

Waxaase suurtagal ah in hannaankani uu yareeyo dowrka haweenka, waayo beelaha Soomaaliyeed badanaa ragga ayay u soo xulaan inay matalaan. Sidoo kale waxuu yareynayaan saameynta xisbiga uu ku leeyahay in uu go'aan ka gaaro cidii xildhibaan noqonaysa maaddaama hannaankan qof doorasho rabo uu tartamayo, meesha noocyada kale uu xisbigu diyaariyo

liiska musharixiinta. Axsaabtu musharixiinta waxa ay ku caawin karaan oo kaliya ololaha doorashada (sida Mareykanka oo kale). Si kasta ha ahaatee, soo jeedintaan waxa ay u baahan tahay isla-aqbal dhaxmara saamileydda siyaasadda.

Beelaha oo noqda deegaan-doorasho

Nidaamka Doorashada	Hal dheeri ama qofkii ugu codbata ayaa guushu raacaysaa
4.5	Waxa uu ilaalinayaan nidaamka 4.5 ee aqalka hoose
Haweenka	Ma ilaalin karo qoondadda dumarka iyo dadka laga badan yahay
Deegaan-doorasho	Beelaha oo aan xaduud lagu jaan-goyn / meeshii ay doonaan ha joogaane
Waxyaalaha uu ku wanaagsan yahay	Dad badan ayuu u ogolaanayaan in ay codeeyaan Waxuu ilaalinayaan isku dheelitirnaanta qabiilka ee 4.5 Waa hannaan waxa hadda jira wax ku kordhinaya
Meelaha uu ku liito	Suurtagal ma ahan maadama uusan hadda haysan isla-aqbalka saamileyda siyaasadda Musuqmaasuq waxaa uu ahaan mushkilo taagan Ma ahan hannaan aad u xoojinaya axsaabta-badan Ma ilaalinaayo qoondadda dumarka

Waxaa jira dhowr soojeedin oo ku aaddan sidii loo heli lahaa doorasho sanadka 2020-ka. Qeybaha kala duwan ee saamileyda siyaasadda wey isku khilaafsan yihii doorka qabiilka ku yeelan karo soo xulida xildhibaanada, iyo in Soomaaliya ay weli wax ku qeybsato hanaanka 4.5.

- Soojeedinta koowaad waxaa riixaya aqoon-yahanno iyo siyaasiyiin dareen degdeg ah ku jira oo doonaya in doorasho qof iyo cod ah la gaaro, waxaa kale oo taageersan qaybta fulinta ee xukuumadda fedaraalka;
- Soojeedinta labaad waxa ay la mid tahay midda kore markii laga reebo nooca deegaan-doorashada ay

noqonayso, waxaana taageersanaa maamul goboleedyadda.

- Dhinacyada taageersan soo jeedinta sadexaad iyo afaraad waxa ay wel-wel ka qabaan in isbadal lagu samayn karo sida hadda wax loo qaybsado ama loo kala leeyahay ee 4.5 ka iyadda oo aan la diyaarin hay'adihii iyo kaabayaashii lagu gaari lahaa doorasho xor iyo xalaal ah. Waxa ay soo jeedinayaan, maaddaama aanu jirin waqtii badan oo doorasho baddiil ah lagu sameeyo, in ay muhiim tahay in la ilaaliyo nidaama awood-qeybsiga beelaha Soomaaliyeed ee labadda aqal.

Waxa ay ku doodayaan in Soomaaliya ay haysto khibrad ku filan in la qabto doorasho dadban, ayna nool yihiin 135-tii oday dhaqameed ee soo ansaxiyay baaralamanaadii hore.

Dadka hanaankaan taageersan waxa ay cuskanayaan doorka odyaasha dhaqanka ay ku leeyihiin soo xulidda iyo dhisidda baarlamanka, iyaga oo tusaale u soo qaataay in dhawaan ay xildhibaanno u soo xuleen Puntland, sidaasna dowlad lagu dhisay.

Is-waafajinta wax-qaybsiga beelaha iyo hannaanka xisbiyada

Sida ay sheegeen Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka, tiro ka badan 50 xisbi siyaasadeed ayaa si ku-meel-gaar ah loo siiyay shahaadada is diiwaan gelinta. Waxa ayna u badan tahay markii lagu sii dhawaado 2020-kana in ay xisbiyo kale is diiwan gelin doonaan,⁵¹ in badan oo siyaasiyiinya Soomaalida iyo aqoon yahanka ahna waa ay hadal hayaan ahmiyadda xisbiyada iyaga oo tilmaamaya in ay ama samayn doonaan xisbi ama mid jira ku biiri doonaan.

Dhanka kale, dad badan waxa ay wel-wel ka muujinayaan caqabadda ka dhalan karta in laga guuro nidaamka awood qeybsiga beelaha ee ku dhisan 4.5 iyo qoondadda haweenku ay baaralamanka ku leeyihiin. Nooc doorasheedka aan ugu magac darnay Soojeedinta Baydhabo iyo midka Kismaayo waa ay oggol yihiin in nidaamka 4.5 sidiisa lagu ilaaliyo. Dhammaan soo jeedimaha ku aaddan hannaanka doorashada 2020-ka waxay ku dadaalayaan in ay is-waafajiyaan hannaanka xisbiyada iyo habka wax-

qaybsiga beelaha ee 4.5, kuwaas oo ah laba hannaan oo aan meel-wada geli karin.

Gunaanad

Su'aasha ku saabsan sida la isku matalayo iyo cidda wax matalaysa ayaa halbowle u ahayd colaadda Soomaaliya ka aloosnayd soddonkii sano ee la soo dhaafay. Markii ay burburtay dowladii kacaanka, 10 sano ayay ku qaadatay saamileeyda siyaasadda in ay dib u soo yagleelaan baaralaman iyo dowlad, waxa ayna ugu dambeyntii ku heshiyeen nidaamka 4.5 ee awood-qeybsiga beelaha. Marka laga reebo Soomaaliland, dalka intiisa kale weli waxuu ka shaqeeya awood-qeybsi beelaha, oo ilaa xad shaqaysa, Aadse uga fog, maamul-wanaagga.

Daraasaddan waxa aan ku tilmaannay in la helo nidaam doorasho oo shaqeeyn kara in uu aasaas u yahay is-afgarad dhix mara saamileyda siyaasadda. Saami-leyda siyaasadda ee Soomaaliya waxaa hormuud ka ah, dowaldda dhixe (oo ay ku jiraan laba aqal), maamul-goboleedyada, iyo xisbiyada siyaasaseed ee diiwaan gashan. Waana sababtii labadii doorasho ee la soo dhaafay ay u shaqeeyeen, waayo waxa heshiis ku dhisan wadar-oggol gaaray dhammaan saamileyda siyaasadda.

⁵¹ Waraysi sarkaal sare ee dowladda.

Doorshadda soo socota, ma jiri karto in hal koox ama hal xisbi uu maquuniyo inta kale, waayo Soomaaliya waxaa ka jira hardan iyo khilaaf baahsan oo aan hal qolona gooni wax abla-ablayn karin. Sidaas darteedna, waa muhiim in saamileydda siyaasadda ay si degdeg ah u bilaabaan in ay ka wada xajoodaan hannaanka doorasho ee dalka u habboon 2020-ka.

Talooyin

- Nooc doorasho kasta oo la qaato waa in uu noqdaa mid aan xaalka Soomaaliya uga darin. Hannaan doorasho oo kooxi ay ku danaysanayso, kuna doonayso in ay xukunka ku qabsato 2020-ka waxa uu dalka u horseedi karaa qalalaaso; waa in aan la ogolaan hannaanka doorashada ee 2020 ka in uu noqdo mid danley ay dejisey waayo, waxa uu dib u celinayaan horumardii soo socday ilaa sanadkii 2000.
- Nooc doorasho kasta oo la qaato 2020, waa in uu jidka uxaaro doorasho qof-iyod cod ah oo hirgasha doorashadan mudda xigta. Doorashooyinkii la soo dhaafay waxa ay dalka u siqinayeen dhanka doorasho xor iyo xalaal ah, hannaanka doorashada ee 2020 waa in uu taa caawimaa.
- Waa in nooca doorasho oo la qaadanayo uu ilaaliyaa doorka dumarka iyo bulshooyinka laga tirada badan yahay.
- Nooc doorasho oo la qaadanayo waa in uu noqdo mid ku salaysan axsaabta siyaasadda. In xisbiyo loo gudbo, waa jidka ugu wanaagan ee lagu gaari karo dimuquraaddiyad buuxda. Si nidaamka xisbiyada oo la qaadanayo uu u noqdo mid horseeda xasilooni siyaasadeed, waa in la mabnuuco shuruucda doorashadana lagu daro in aan xisbi lagu soo galay baarlamaanka laga bixi karin, in kasta oo xisbiyadu ay samayn karaan isbahaysiyo; in Soomaaliya laga hirgeliyo hannaanka xisbiyadana waxa ay keenaysaa in lagu guuro isir isku raacid, loona guuro aragti wadaag,
- Dadka ka qeyb qaadanaya doorashadaas waa in ay noqdaan dadka ugu badan ee codayn kara, si loo yareeyo musuqmaasuq, loogana dhigo maxsuulka tartanka ka soo baxa mid loo dhan yahay ama haysta taageero badan oo muwaadiniinta ah;
- Noocii doorasho ee la qaato waa in dhaqaale loo hayo ama loo heli karo
- si loo hirgelin karo waqtiga kooban ee ka harsan 2020;
- Noocii doorasho oo la qaato, waa in ay isku waafaqaan saamileyda siyaasadeed (gaar-ahaan, dowladda dhixe, maamul goboleedyadda iyo axsaabta siyaasadda). Doorashooyinkii 2012 iyo 2016 waxa ay u hirgaleen, waxaa isla qaatay saamileyda siyaasadda;

- Sharciga doorashada ee la soo bandhigay waxa uu qaatay habka boqoleyda iyo celceliska ee loo yaqaan ee *Sainte Lague – ee* codadka kuraas loogu badelo – ee lagu maamul hannaanka matalaadda isku dheelliga tiran ee liiska xiran ee xisbiyada. Waa in qaab-xisaabeedkaas dib loogu noqdo waayo waa mid Soomaaliya ku cusub, aanna aad loo fahmi karin; Soomaaliya waxa ay horay u isticmaashay qaabab xisaabeed ka fudud;
- Sharciga doorashooyinka ee miiska saran ma aha mid si hufan wax uga qabanaya musuq-masuqa. Musuqa iyo codka oo la gato ama la iibiyo waa in fal-danbiyeed laga dhigo, iyada oo sharciga doorashada loo marayo ama sharci la dagaalanka musuq-masuqa;
- Waa in la aasaasaa Maxkamad Dastuur oo hab hufan oo isla-oggol ah ku timid, si ay wixi is-qabsi ah oo ka yimaada doorashada u xaliso.

